JAMHUURIYADDA DIMUQORAADIGA SOOMAALIDA
WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

# SUUGAANTA

## FASALKA AFRAAD

## 4



# SUUGAANTA

## FASALKA AFRAAD

## 4

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIIJTA

# HORDHAC

Buugagga suugaanta fasallada 4aad, 5aad iyo 6aad waxaa loogu tala galay in fasalkiiba sannad walba hal buug lagu qaato, waxayna ka kooban yihiin maanso, sheekooyin, Curisyo, Maahmaaho iyo Halxidhaale.

In kasta oo ay adag tahay in la micneeyo «Suugaan» waxaanu u aragnaa in ay tahay hadal ama qoraal kooban una dhigan sidii : Maanso (gabay, buraanbur, jiifto, guurow, heeso iwm.) curisyo, riwaayado, maahmaahyo iwm. Kuwaas oo ka dhasha nolosha, dhaqanka, dhaqaalaha iyo degaanka Ummadda, saameeyana fikradaha iyo aragtida bulshada.

Qoris la'aanta afka-hooyo awgeed ayaa Suugaanta Soomaaliyeed, hadda ka hor, aan lagu dhigi jirin dugsiyadeenna. waxaannu, markaa, kula talinaynaa barayaasha fasallada ka dhigayaa in ay kordhiyaan barashada Suugaanta isla markaasna abuuraan in ardaydu garato waxtarka ay u leedahay kobcinta fikraddooda iyo taabbagalka afkaba, iyagoo la kaashanaya dadka Soomaaliyeed ee Suugaanta wax ka yaqaan oo joogga meesha uu dugsigoodu ka furan yahay.

ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.
horumarinta Suugaanta ay u soo tebiyaan Xafiiska Manaahijta
6aad, dabadeedna wixii fikrado iyo talooyin ah ee la xidhiidha
aad uga bogtaan Suugaanta loo dejiyey fasallada 4aad, 5aad iyo
Waxa kale oo aannu ka codsanaynaa barayaashaas in ay

Waxa aan mahad u celinaynaa Cabdillaahi Xaaji Maxa-

5aad, iyo 6aad.
gaan oo qoray buugagga loogu tala galay fasallada 4aad,
Waxaannu u mahadnaqaynaa, Jaallayaasha hoos ku sheegmed oo gogoldhiggii hawsha suugaanta bilowgeedii si fiican nooga kaaliyey, Cabdillaahi Maydhane Warsame iyo Cabdil-

laahi Cali Axmed oo lahaa qoraalkii gabayada ku jira saddexda buug; Ibraahim Cali Rayaale, Cumar Maxamed Saalim iyo Cali Buraale Raage oo lahaa curinta, uruurinta iyo qoraalka sheekooyinka iyo curisyada ku jira buugagga, Maxamuud Maxamed Faarax oo isku dubbariday heesaha ku jira buugagga. Kinsi Caydiid Raage iyo Shamsa Yuusuf Ismaaciil oo lahaa uruurintii iyo qoraalkii Buraanburrada ku jira Suugaanta saddexda buug, guddiga suugaantana ka kaaliyey xagga xoghaynta, Maxamed Cabdi Jaamac, Axmed Cali Cilmi, Cabdullaahi Xaaji Cali iyo Cismaan Sheekh Maxamed oo soo uruuriyey maansooyinka qoran in ka mid ah, Ciise Maxamed Ciise, Axmed Sheekh Xuseen, Xasan Salaam Axmed oo ah farshaxannadii ku howshooday sawirradii buugaggu u baahnaayeen. Waxa kale oon mahad ugu celinaynaa Daa'uud Daahir, Xasan Sheekh Muumin, Cumar Aw Xuux iyo Ismaaciil Ducaale, tilmaamihii iyo talooyinkii aan ka helnay. Waxaan kale oon mahad u celinaynaa dadka Soomaaliyeed iyo dadka kale ee aan xusnayn ee aannu si uun gacan uga helnay.

Mahad gaar ah waxaan u celinaynaaWakaaladda Madbacadda Qaranka oo shaqaaleheedu xil gaar ah iska saaray buugaggan daabacaaddoodii.

**Bashiir Faarax Kaahiye**
Maamulaha Xafiiska Manaahijta, W.W.B

# TUSMADA


| Casharka | Bogga |
|---|---|
| Calanyow ha dhicin | 1 |
| Isafgarad | 2 |
| Gobannimada | 3 |
| Warshadda Hilibka | 5 |
| Dhulkayga | 7 |
| Calool adayg waa ilaahay wehelkii | 8 |
| Calanka | 9 |
| Allaa watoo wehel uma baahna | 12 |
| Heesta Oktoobar | 14 |
| Sheekh Bashiir | 16 |
| Geela | 18 |
| Libaax, Habar iyo Abeeso | 20 |
| Beer Falanno | 22 |
| Buraanbur | 24 |
| Geeraar | 25 |
| Marti soor dabagaalle | 27 |
| Hanti wadaagga Cilmiga lagu habeeyey | 29 |
| Xilka guud ahaaneed iyo ka gaar ahaneed | 31 |
| Dayo iyo Dibindaabyadeed | 32 |
| Heesta Afka hooyo | 35 |
| Gaadiidka | 37 |
| Dalxiis | 38 |
| Xannaanada Xoolaha | 40 |

Buraanbur . . . . . . . . . . . . . . 42
Rafad . . . . . . . . . . . . . . . 43
Lax indha la' . . . . . . . . . . . . . 44
Heesta geela . . . . . . . . . . . . . . 46
Marka la daaq geynayo . . . . . . . . . . . 46
Marka la Carraabinayo . . . . . . . . . . . 47
Marka carrada la siinayo . . . . . . . . . . 47
Marka la waraabinayo . . . . . . . . . . . 47
Marka la durduurayo . . . . . . . . . . . . 48
Iskaa wax u qabso . . . . . . . . . . . . 49
Nimaan hadlin habartiina wax ma siiso . . . . . . 52
Heesta lo'da . . . . . . . . . . . . . . 54
Marka la waraabinayo . . . . . . . . . . . 54
Marka la daajinayo . . . . . . . . . . . . 54
Marka la carraabinayo . . . . . . . . . . . 54
Iskaashi . . . . . . . . . . . . . . . 55
Gabay (Syiaad) . . . . . . . . . . . . . 56
Heesaha Carruurta . . . . . . . . . . . . 58
Heesta wiilasha . . . . . . . . . . . . . 59
Gabadha . . . . . . . . . . . . . . . 59
Hooyada . . . . . . . . . . . . . . . 60

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin ogolaansho

Waxaa lagu daabacay

Madbacadda Qaranka

Xamar, 1976

## CALANYOW HA DHICIN (HEES)

Heestan la yiraahdo «calanyahow ha dhicin» waxay ka mid ahayd heesihii loogu damaashaaday dhalashadii calanka Soomaaliyeed oo astaan buuxda u ah qarannimada iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed. Abwaanku wuxuu ku muujinayaa sida dadka Soomaaliyeed ay ugu dhaataan calankooda, geesiyaal badanina naftooda ugu hureen. Qaar kalena ugu heegan yihiin. Heesta waxa curiyey abwaanka Cali Diiriye «CALI GAAB» oo ku caan ah curinta gabayada iyo Riwaayadaha intaba.

**Calanyow ha dhicin, ha dheeliyin, weligaa dhisnow.**
**Calanyow ha dhicin, ha dheeliyin, weligaa dhisnow.**

**Maanta waa dharaartay, dhibaatadu na deysey dhulku noo iftiimee.**
**Maanta waa dharaartay, dhagaxtuur agtiisana dhiiggii qulqulay ay ka dambeysay dhibicduye.**

**Maanta waa dharaartaan gobannimada dhalinee calankeenna dhidibnee.**

**Calanyow ha dhicin, ha dheeliyin, weligaa dhisnow.**

**Maanta waa dharaartii dhiig shubasho guurtee**
**nacabkii na dhaafee**

**Maanta waa dharaartii dhallinyariyo waayeel**
**dhaxantu ay ka duushee.**

**Maanta waa dharaartii beentu ay dhammaatee runtu ay dhabowdee.**

**Maanta waa dharaartii qosol aan la dhacayee dhoollaha caddeeye dhag-dhag aan u seexdee.**


**Maanta waa dharaartaan gobannimada dhalinnee Calankeena dhidibnee.**

**Calanyow ha dhicin, ha dheeliyin, weligaa dhisnow.**

## L A Y L I S

1. Awr rarani waa dheeliyi karaa, haddaba sidee buu Calan u dheeliyi karaa?
2. Sheeg dharaarta abwaanku tilmaamayo?
3. Maxaa ka dhacay goobta dhagaxtuur? Maxaase ka danbeeyey?
4. Abwaanku muxuu uga dan leeyahay: b) dhiig shubasho guurtee? t) dhaxantu ay ka duushee?
5. Maxaa ka farxiyey gabayaaga?

## ISAFGARAD (SHEEKO)



Wiil baa cilmi u doontay meel ka durugsan degmadoodii. Muddo markii uu ku maqnaa baa aabbihii arkay safar u jeeda meeshii inanku joogey. Wuxuu ku yidhi: «Wiilkeygii iiga soo warrama». Safarkii wuxuu tegey magaaladii, inankiina farriintii bay u tebiyeen. «Aabbahay waxaad ku tiraahdaan waan ladnahay, shanta salaadoodse weyso qudha baan ku tukadaa», inankii baa safarkii aabbihii u soo faray.

Nimankii baa soo laabmay, farriintiina u keenay odaygii. Nasiib wanaag wuxuu helay markiiba kuwa kale oo u socda meeshii inanku joogey. Inankii wuxuu ugu dhiibey soddon saaf oo hilib ah iyo ubbo subag ah. Wuxuu yiri: «Waxaad inankeygii ku tiraahdaan, bishu waa soddon, balliguna waa buuxaa».

Intay nimankii jidka ku sii jireen bay wax ka dhiciyeen ammaanadii oo intii kale u geeyeen inankii, farriintiina u sheegeen. Markii uu ka guddoomey alaabtii ee uu hubsaday tirsigeedii buu yiri: «Alaabtii aabbahay idiin soo dhiibey ma dhamma ee maxaa dhacay?» Intay nimankii isku yaxyaxeen oo afka gacanta saareen bay ku yiraahdeen: «Waa runtaa ee naga raalli ahaw, xaal iyo xoolahaagii wixii ka maqnaa qaado, noona xil qari».

**L A Y L IS**

1. Sheeg waxay u taagantahay farriinta inanku?
2. Maxaa ku kallifey inanka iyo aabbihii inay hadal dahsoon ku wada hadlaan?
3. Tilmaan waxtarka ama waxyeellada ay keeni karto hadal dahsoonidu?
4. Dulucda sheekadu waa maxay?

## MAAHMAAHO.

1. Hadal murti leh iyo hilib miid leh midna laguma mergado.
2. Hadal ninna si u yiri ninna si u qaaday.
3. Nin yari intuu laan ka boodo ayuu tala ka boodaa.

## (1) GOBANNIMADA (JIIFTO)

Xaaji Aadan Axmed oo ku magac dheer **«AFQALOOC»** wuxuu ku dhashay degmada Ceerigaabo ee Gobolka Sanaag 1862kii, halkaasaanu ku barbaaray, dabeedna yaraan debadda u uga dhoofay.

Xaajigu isagoo nin waayo-araga ah, da'diisuna tahay 81 jir ayuu ku soo laabtay waddankiisa, 1943kii, isla-markaana

bilaabay curista gabayga, horna ka galay dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka ahaa.

Jiiftadan wuxuu tiriyey 1959kii, xilligii halganka gobannimadoonka heerkii u dambeeyey uu marayey, waxaanu ku muujinayaa sida ummadina aanay hawl yari iyo hurdo, gobannimo ugu helayn ee dhibaato, hawlkar iyo dhidid ay ugu xidhantahay.

**wuxuu yidhi:-**

**Gobannimada hawlyari ninna kuma helaayee**
**rag horumar doonana waayaa horjooga e**
**haasaawe jiif iyo hurdo kuma timaaddo e**
**habeen nimaan u guureyn hoo lama yidhaahdo e**
**halkay taal wax kaa xiga halas iyo dab weeye e**
**hore aad u jiidho baa hadafkeedu yahayoo**
**hammada iyo ujeedaduna dhaxal aan hadhay-nin weeyee**
**halkaan caawa joogana rag baa loo hagaajay e**
**hanadkii Nakruumana hibadii buu ku helayoo**
**haytimihi Gaandaa beryo lagu horjoogay e**
**haramnimo nin lagu xidhana sacdi bow horreeyeyoo**
**anna kama hinniye maanta taariikh bayga hadhiyoo**
**haad-biidhiga iyo biraha habro looma tumannine**
**nin harraati diidaa hoggaan looga dhigay e**
**haweenka iyo doqontaa ka halaanhalaaya e**
**hawlqaad aniga oo kale hoh kama yidhaahdo e**
**hamaannadaa gala laga haybadaysto e**
**hammi nimaan lahayn baa hagar-daamo mooda e**
**higmadda iyo bustahan yari ka hagaagsan ruumiye**
**hadhuudhkayga ii keen halla maaha xaalkuye**

(1) Gabayadii Xaaji Aadan Afqallooc ee u ururiyay Cumar Aw Nuux.

## L A Y L I :

1) Jiiftadan kumaa tiriyey? Muxuu ka hadlayaa, yaanuu la hadlayaa?

2) Erayadan laga soo xulay jiiftada, u macnee siday jiiftada ugu jiraan: waayo, haasaawe, haaro, hebel, halas, hinniye, harraati, hoggaan, higmad, hagar-daamo, ruumi.

3) Lixda tuduc ee ugu horreeya ka hadal macnahooda.

4) Haasaawe jiif iyo hurdo kuma timaaddo e. Muxuu Xaajigu u leeyahay caynkaas? Ka hadal.

5) Halkaan caawa joogana ragbaa loo haggajee. Sharax.

6) Haad-biidhiga iyo biraha habro looma tumaannine. Yaa loo samaystay haad-biidhiga iyo biraha kaleba?

7) Jamaal Cabdinaasir, Adolf Hitler, Nekruma, Mahatma gaandi nimankan kor lagu magacaabay waxay ku caan ahaayeen iyo ciddav ahaayeen sheeg?

Su'aasha celinteeda waxa la filayaa baruhu inuu ardada si fudud ugu sharxo uguna faahfaahiyo.

## WARSHADDA HILIBKA.(CURIS)

Dalkeennu waa dal hodan ka ah Xoolaha, siiba geela, lo'da, iyo arigaba. Xoolahaas tiradooda waxa lagu qiyaasaa, kolalka qaarkood toban ilaa shan iyo toban malyuun oo neef. Xoolaha dhaqashadooda tarankooda iyo xannaanadoodu waa waxyaalo aynu hidda isaga leennahay. Miyi iyo magaalaba waa iyaga kuwa nacfi ahaan lagu nool yahay. Xoolaha dalkeenna innagoo qudhi kuma noolin ee dalalka Shisheeyaha ayaa loo dhoofiyaa. Kumanyaal neef baa sannad kastaba ka dhoofa dekadaha dalkeenna. Ganacsiga xooggiisu waa Xoolaha.

Xoolaha nool dhoofintooda waxa ka hawl yar, kana nacfi badan in inta dalka lagu qalo, hilibkooda la dhoofiyo. Sidaas darteed, Warshad Lo'da lagu qalo ayaa dawladdu dhistay, waxayna ku taal magaalada Kismaayo.

Warshadda hibilka ee Kismaayo, sida warshadaha dalalka kale bay u qaybsan tahay dhawr laamood oo mid kastaba hawl goonniya lagu qabto, sida: meesha gowraca, tan qalista, tan hilibka cabbaysa, iyo ta daasadda laxaamadda, ka dibna shaabadaysa oo magaca ku qorta.

Warshadda Hilibka maalin walba ugu yaraan, laba boqol

oo neef oo Lo' ah baa lagu qalaa. Bishii ugu yaraan hal malyuun iyo bar qasacadood oo hilib ah bay soo saartaa. Intaa waxa raaca hargaha, lafaha iyo waxyaalo kale oo Xoolaha lagu qalo Warshaddaas laga helo oo iyaguna nacfi goonniya leh.

Warshadda hawsheedu sidaa tahay waxay u baahan tahay xoola aan kala go'in oo shilis, oo miisan culus leh, oo hilibkeeda iyo hargaheedaba faa'iido weyn laga helo. Sidaa daraadeed Warshadda waxa loo seeray meel 25 kiiloomitir magaalada u jirta oo Xoolaha lagu xannaaneeyo. Waxa kale oo loogu talagalay biyo, baad iyo daawo. Warshaddu nacfiga ay waddanka dhaqaalihiisa ku kordhiso ka sokow, dad aan yarayn, haween iyo ragba, ayaa shaqooyin kala duwan ka helay, dadkii xoolaha dhaqayey iyaguna si le'eg ayey xoolaha laga iibsado ka (sokow), xoolahooda xannaanadoodu ugu sii dheertahay. Farsamada warshadda hilibka ee Kisimaayo ay ku shaqayso waa mid yidiiillo ku gelineysa. Qofkii soo daawadaana aqoon yaab leh baa ugu kordheysa.

**L A Y L I S :**

1) Maxaa ka mid ah waxyaalaha dalkeennu hodan ku yahay?

2) Wax ka sheeg siyaabaha dadkeennu xoolaha u dhaqaaleeyo?

3) Xoolaha dalkeenna ma Soomaalida oo qudha ayaa manaafacaadsata?

4) Sheeg dalalka kale ee aynu u dirro?

5) Sheeg ugu yaraan saddex sababood oo loogu doortay Warshadda hilibka Kismaayo?

6) Sheeg waxyaalo kale oo nacfi leh oo ka soo dhex baxa?

7) Maxay dawladdu xannaanada dheeraadka ah u siisaa xoolaha?

8) Sheeg faa'iidooyinka ay leedahay warshaddu?

## DHULKAYAGA (HEES)

Heestan ku magac dheer «Dhulkayaga» wuxuu curiyey Ismaaciil Sh. Axmed sannaddii 1959kii markii halganka gobannimodoonku ugu kululaa. Ismaaciil waa nin caan ku ah gabayo iyo heesaba. Waxay heestanu ka mid ahayd heesihii uu ku guubaabinayey dhallinyaradii halganka gobannimodoonka ka qayb gashay. Ismaaciil isaga oo si geesinimo ku jirto u tusaalaynaya wuxuu ku baraarujiyey dhallinta, labood iyo dheddigba, inay u dhiidhiyaan dhulkooda, garawsadaanna inuu mudan yahay in loo dhinto, dhiigna loo qubo.

### DHULKAYAGA

Dhulkayaga, Dhulkayaga;
Waw dhimanaynaa dhulkayaga;
Dhallin iyo dhallaan, waayeelka dhursugey;
waw wada dhannoo, waw wada dhannoo;
waw dhimanaynaa dhulkayaga.

Dhiig inaan ku shubo, aan dhagar ku galo;
waa ku dhaarsannoo, waa ku dhaarsanoo;
waw dhimanaynaa dhulkayaga;

Waw dhalannayoo, waannu dhiirrannee;
Dhib iyo xumaan, dhib iyo xumaan;
Waa ka dhowraynaa dhulkayaga;
Kaan ku dhaadani, wuu dhoohanyoo;
Waa ka dhega la'yee, waa ka dhega la'yee;
Waw dhimanaynaa dhulkayaga.


**L A Y L I S :**

1) Maxaa waayeelku u dhursugey? Beydka qaad.

2) Dhulka Soomaaliyeed intuu ka kooban yahay sheeg

3) Magacow shan geesi oo naftooda u huray dalka?

4) «Dhibta iyo xumaanta» uu abwaanku sheegayo maxaa ka mid ah?



Waraabaa nayl yar oo durdur ka cabaya u yimid.

Waraabe : maxaad biyaha iiga dhooqaysay?

Nayl : Sawdigaa halkaa sare ee biyuhuba ka soo dhacayaan iga xiga. Ma biyo kor tagaa la arkay?

Waraabe : maxaad ii cayday?

Nayl : hadmaan ku caayey?

Waraabe : kalhore.

Nayl : mabaan jirin.

Waraabe : dee haddaa aabbahaa buu ahaa.

Nayl : Aabbahay kal hore waa mootanaa oo uur ku hadh baan ahay.

Waraabe : waan hubaa oo kolley mid qoyskiinna ah buu ahaa

Nayl : sidaasi waa gardarro aan meella loogu soo gabban. Waar waxaad dooneyso samee.

Waraabe : waad edeb daran tahay. Waxaan ku barayaa asluubta wanaagsani siday tahay. Markaasuu ku soo booday. Naylkiina, intuu samada soo lalayey buu u banneeyey meeshii, dhadhaab cid la'ah buu ku dhacay waraabihii oo dhexda ka kala booday.

Naylkii : baga iyo baga, siddi - siddi - daada mooyee dhul u dhacaaga hubso.

**L A Y L I S :**

1) Waraabuhu ma ka fiirsanayey weydiinuhu weydiinayey naylka?
2) Naylku muxuu uga carari waayey markiiba?
3) Waraabuhu miyuu sabab u raadshaa ninkuu cunayo?
4) Dulucda sheekadu waa maxay?

## Maahmaaho

1) Nin laga adag yahay laga Alle roon.
2) Laba biyo hoostooda iska harraatiyey iyagaa is og.
3) Bahal lalama derso.

## CALANKA

Cabdillahi Suldaan «Tima - cade», wuxuu ku dhashay 1917kii Gobolka Waqooyi Galbeed ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya. Cabdillaahi halkaasu ku koray kuna barbaaray kuna geeriyooday 1973kii isagoo muddo dheer ka gabyi jirey Idaacadda Hargeeysa. Caan wuxuu ku ahaa curista gabayga gaar ahaanna wuxuu u lahaa luuq u goonniya loona wada yiqinney. Gabayadiisu waxay saameeyaan dhinacyo badan oo nolosha ka mid ah, gaar ahaan waddaninimada iyo qarannimada. Haddaba Cabdillaahi, alla haw naxariistee, gabaygan soo socda wuxuu ka tiriyey meel dad Soomaaliya oo isku

wada ujeeddo ah, isku dan ah, isku duuban, gacmaha iswada haysta oo isku wada niyad ahi ay ugu kulmeen inay u dabbaaldegaan maalin dadka Soomaaliyeed ee gobonnimada jecel si gaar ah ay maskaxdooda ugu haysan, maalintaasoo ahayd 26kii Juun 1960kii, maalintaasoo dad soomaali oo xori ay taageen calankii gobonnimada soomaaliyeed ee ugu horreeyey ee laga taago ciid Soomaaliyeed, calankii gumeystaha Ingiriiskana halkaa lagu laalaabay.

**Calankannu sugaynaye sahankiisa ahaynow**
**seermaweydo hillaacdayow sagal maanta darroorayow siigadii naga maydhay.**
**saqdhexaannu ahayne kii soo saaray cadceeddow**
**samada kii u ekaayee xiddigaa mid la siiyayow**
**saaxirkii kala guuraye, sarreeyow ma nusqaamow**
**aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.**

*** * * ***

**Saahidiinta islaanka e subcisa jimcayaashiyo**
**sibyaantiyo haweenku calankay saadsheenow**
**cidina kaanay na siinine saatar noogu yaboohayow**
**saaxirkii kala guuraye, sarreeyow ma nusqaamow**
**aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.**

*** * * ***

**Salaantii istiqlaalkow, sadadu kay ku xidhnaydow**
**sayruukhii Afrikaadow**
**saaxirkii kala guuraye, sarreeyow ma nusqaamow**
**aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.**

*** * * ***

**Sanku-neefle dhammaantii, khalqiga kii u sinnaayow**
**mid saaxiib la ahaynow, singalka kii iska diidow**
**saaxirkii kala guuraye sarreeyow ma nusqaamow**
**aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.**

*** * * ***

**Soomaaloo iscunaysoo, saqda qaylo dhawaaqdiyo**
**sulub laysu cabbaystiyo, hadba soof la xabbaadhiyo**
**saraayaa dami weyday kay siinlaydiisu na saaqdiyo**
**kii sadqeeyey qabaa'ile,**
**isu saaray gacmaayee saf walaala ka yeelayow.**
**Saaxirkii kala guuraye sarreeyow ma nusqaamow**

**aan siduu yahay egnee kaana siib kanna saar.**

**In sidayda tihiiniyo, in kalaanan saxaynine**
**soomaaloo calan taagta, saakay noogu horreysa**
**oo saddex wiig iyo maalmo haddaan soor cuniwaayo**
**safrad laygama yaabo sodhina mayso naftaydu e**
**saaxirkii kala guuraye sarreeyow ma nusqaamow**
**aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.**

**Nimaankii na siraayeye waax - waax noo kala saaftaye**
**solonaayey cadkeenna ee innagoo dhexda suunku**
**sabarkeenna qarqooray**
**kii sedkeenna cunaayey sarartiisa ka muuqdaye**
**surwaalkii ka yaraadaye daar loo sibidheeyiyo**
**sariiraa lagu seexdiyo kabadh suuf laga buuxshiyo**
**sagaal booy iyo kuug iyo weliba seeska lahaa**
**kii saabaanka u laabayow saaxirkii kala guuraye,**
**sarreeyow ma nusqaamow**
**aan siduu yahay eegnee, kaana siib kanna saar.**

**Sowjarkaa hubka qaataye, intuu soodhka ku**
**taagay u diyaara salaantiyo**
**saraakiisha amraysaay sifadii isticmaarka, ka siyaadiya**
**maanta oo sibilkeennan agjoogow**
**sibirtooda istaaga oo nin walbaan siddi dheh**
**oo nin walow saddex goor subxaanow waa mahad-**
**daa dheh.**
**saaxirkii kala guuraye sarreeyow ma nusqaamow**
**aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar.**

**L A Y L I S :**

1) Gabaygan yaa curiyey?

2) Waxaad ka hadashaa shanta tuduc ee ugu horreeya?
b) sifada calanka, t) sidaynu ahayn, intaanu dhalan, j) wuxuu innoo taray?

3) «Saaxirkii kala guuraye, sarreeyow ma nusqaamow aan siduu yahay eegnee kaana siib kanna saar»

b) saaxirku kumuu ahaa? t) yaa kala leh calan-

ka la siibayo iyo ka la saaray? j) dalkeenna immisa sano ayuu Ingiriisku addoonsanayye? Talyaaniguna?


4) Si fiican oo hufan u sharax tuducyada, 13naad iyo 14naad.

5) Kor ka qor tuduca 21aad illaa ka 25aad si habboonna waxaad u sheegtaa micnahooda.

6) Qor tuducyada muujinaya in gabayaaga iyo dadka Soomaaliyeed ee kaleba ay aad ugu riyaaqeen dhalashada calanka.

7) Calanka gobannimada ka hor baa la suubiyey, sheeg taariikhday ahayd.

## ALLAA WATOO WEHEL UMA BAAHNA



Waxaa la yiri diinku waagii hore ma lahayn qoloftan adag ee uu dusha ku leeyahay. Wuxuu ahaa hilib soconaya oo dusha xayaabo ku leh.

Maalin baa shinbiruhu u heshiiyeen inay cunaan hilibkaas fiican ee jilicsan. Diinkii baa loo soo digey: «Waar shimbirihii baa kuu heshiiyee dhuumo oo isqari». Wuxuu ku tiraabay:

«Sow halkay iigu shawrayeen Ilaahay ma joogin?». Waxaa lagu yiri: «Ilaahay meel walba waa jooga». «Haddaba ka xil la'-aada, wax aan ka baqanayaa ma jiro, maxaa yeelay Ilaahay isagaa yaqaan sida uu ii ilaalinayo. Naftaydaan aamminsanahay. Ilaahayna waan ku kalsoonahay, taladiisana wax lalama simo».

Shimbirihii oo koox-koox u wada socda ayaa diinkii soo weeraray; ayaandaradooda waxay u yimaadeen diinkii oo qolof adag Eebbe ku tahaaray; kumase qancin qoloftii bay afkooda yuuban la dhaceen oo isyiraahdeen ka dhex dusiya waxaase ka raacday mahadho wari iyo waxaan laga soo waaqsan. Halkay ka eegayeen in ay ku shimbiro waaqleeyaan oo ay cunaan, ayaa shimbir walba afkii soo laabmay, isagana korkii baa ka buus-busmay.

## Laylis

1. Shinbiruhu maxay ku heshiiyeen? Waayo?
2. Waa maxay shimbiro-waaqleysku?
3. Diinka maxaa nabadgelyeeyey, maxaase u sabab ahaa?
4. Dulucda sheekadu waa maxay?

## Maahmaaho.

1. Allaa watee wehel uma baahna.
2. Hunguri wedkii ma arko.
3. Nin Ilaah leh looma dardaar weriyo.

## Halxidhaale.


1. Addimo goroyo ma jeenyaa ma lugaa?

## HEESTA OKTOOBAR.

Heestan oo ka mid ah heesaha loogu dabbaaldego iidda Oktoobar waxay la curatay kacaankii bishii Octoobar 1969kii. Heestu waxay tilmaamaysaa sida Ummadda Soomaaliyeed ay ugu riyaaqday dhalashadii kacaanka. Waxay kale oo tilmaamaysaa himilooyinka Ummadda oo ah in laga madax bannaando qabiilo, cadaalad darri, musuq-maasuq iyo wixii la mid ah. Heestaa waxa curiyey abwaanka Cali Sugulle oo ku dhashay Oodweyne. Cali wuxuu ka mid yahay shaqaalaha Wasaaradda Warfaafinta iyo hanuuninta dadweynaha.

**Oktoobar waa daruur hillaacday oo soomaali u**
**da'dee ay ku doogsadeene, Oktoobar.**
**dalkii baa iftiimay, Oktoobar**
**dadkii baa u riyaaqay, Oktoobar**
**dulli baynu tuurray, Oktoobar**
**qabiil baynnu duugnay, Oktoobar,**
**xooggii baa dadaaloo, xukunkii dalka haystee,**
**dadkiina waa ku raacee, hambalyo diiran hooya.**
**dantu wada jir weeyee, daryeel aynnu gaadhno.**
**Oktoobar, Oktoobar,**
**Oktoobar waa daruur hillaacday oo soomaali**
**u da'doo ay ku doogsadeene, Oktoobar.**

**Waagii baa dillaacay, Oktoobar**
**dabkii baa la qaaday, Oktoobar,**
**Xaqii baa la doonay Oktoobar**
**Xooggii baa dadaaloo, xukunkii dalka haystee.**
**Dadkiina waa ku raacee, hambalyo diirran hooya**
**Dantu wadajir weeyee, daryeel aynnu gaadhno.**



**L A Y L I S :**

1) Muxuu abwaanku bisha carrabka ugu adkaynayaa?
2) Muxuu ugu tilmaamay abwaanku bisha Oktoobar «daruur hillaacday oo soomaali u da'day»?
3) Xukunka dalka Oktoobar 1969 ka hor yaa hayey?
4) Maxay ku kala duwan yihiin labada xukun?

## SHEEKH BASHIIR (curis)

Meel kasta oo soomaaliyi joogtaba, waxaan shaki ku jirin inay ka kaceen dad wadaninimo iyo qiiro weyn lihi. Waxayna muujiyeen intii uu isticmaarku joogay, si haddii ay dhintaanna wadankooda ay dhaxal ugaga tagaan. Sheekh Bashiir wuxuu ka mid ahaa geesiyaashii ka kacay Degmada Burco ee Gobolka Togdheer. Waxaanuu ka mid ahaa dhallinyaradii wax ku baratay Taleex oo ahayd xaruntii Daraawiishta. Sheekh Bashiir markii uu weynaaday, wuxuu aad uga shaqeyey sidii diinta Islaamaka loo xoogeyn lahaa, dadkana si fiican loo bari lahaa. Degmada Burcona wuxuu ka furay dugsiyo badan oo lagu baran jirey Quraanka iyo afka carabiga. Waxaanu aqoonsanaa inay diinta Islaamku tahay ilayskii nolosha iyo barwaaqada aadamiga. Wuxuu kaloo aamminsanaa dadka Islaamka si fiican u bartaa, siday tahayna ugu dhaqmaa, inay si walba kaga sitaan dadka kale. Sheekh Bashiir wuxuu ka sheegay wadaadada qaarkood inay diintii ka dhigteen hub ay ku shaqaystaan oo dadka lagu baryo, iyagoo weliba sheeganayey inay leeyihiin wax loo yaqaan rooxaan, karaamo, awliyo, iyo waxyaalo kale oo badan oo ay dadka ku siri jireen.

Sheekh Bashiir, isagoo la dagaallamaya wadaadadaa diinta Islaamkana faafinaya, waxa la sheegay beri inuu magaalada Burco isugu yeedhay wadaaddo badan oo sheegan jiray waxyaalihii aannu soo tirinay ee ay karaamadu ka mid ahayd. Dabadeed intuu koob meel dhigay ayuu ku yiri wadaadadii: «Bal Karaamadiinna iyo awoodiinna oo dhan isu geeya oo koobkaa ku jebiya weliba soddonka jus ee quraankana ku akhriya». Wadaadadii markay in badan aamusnaayeen, ayuu isagii budhkiisii ku dhuftay oo jebiyey koobkii. Kolkuu koobkii burburiyey, buu yi-

ri: «Wadaadow diinta iyo camalku waa wada socdaan». Dagaalkii 2aad dhexdiisii, markii dadka soomaaliyeed u adkaysan kari waayeen maamul xumadii Ingiriiska, ayaa Sheekh Bashiir iyo gumeystihii caddaan isaga horyimaaddeen. Kolkii gumeystuhu iska horkeenay dadkii ee qolaba qolo ku diray, ayuu Sheekhu ku dadaalay inuu dadka dhexdiisa nabad geliyo ka dhaliyo. Waxaanuu sameeyey ciidan yar oo dab leh. Dabadeed, duullimaad buu habeen ku soo qaaday magaalada Burco. Wuxuu isku deyey inuu dilo gaalkii Ingiriiska u xukumi jirey Degmada Burco, hase yeeshee, isaga iyo haweeneydiisiiba way ka dhuunteen.

Sheekh Bashiir, gumeystaha iyo kuwii la jireyba aad ayuu u necbaa. Wuxuuna labadoodaba u yiqiin «wagash - wagash». Dabadeed, ciidan xoog leh ayaa lagu saaray Sheekh Bashiir iyo colkiisii. Sannadku markuu ahaa 1945kii ayey ku kulmeen meesha la yiraahdo Daba - Buur - dhaab, oo ka tirsan Degmada Buuhoodle yare oo ku taal gobolka Togdheer. Dagaalkaas buu Sheekh Bashiir ku dhintay.

Iyadoo la dhawrayo oo la maamuusayo Sheekh Bashiir wanaggii uu dalkiisa u qabtay, waxa lagu magacaabay Dugsiyada hoose ee Hargeysa ka dhisan mid ka mid ah iyo dugsi sare oo ka dhisan magaalada Burco. Xukuumadda tawriga ahina magaalada Burco waxay uga dhistay taallo lagu magacaabay «taalla dii Sheekh Bashiir». Taasina waxay caddaynaysaa inuu abaalkiisa helidoono qofkii dalkiisa wanaag u qabtaa.

**L A Y L I S :**

1) Sheekh Bashiir xaggee buu wax ku bartay?
2) Sidee buu Sheekhu u xoogeeyey diinta?
3) Maxaa ka mid ahaa waxyaalaha uu aamminsanaa Sheekhu?
4) Muxuu u xujeeyey Sheekhu wadaad xumaha?
5) Muxuu ka kacay dagaalka Sheekh Bashiir iyo gumeystihii Ingiriisku?

6) Muxuu Sheekhu ku magacaabay gumeystihii iyo kuwii la jirey?

7) Maxaa Dugsiyada loogu magac daray, taallooyinkana, loogu dhisay, Sheekh Bashiir?

8) Sheeg ugu yaraan saddex qof oo kale oo iyana gobannimada u soo halgamay?

## GEELA (gabay)

Alla haw naxariistee, Cumar Xuseen oo ku magac dheeraa «Ostreeliye», isagoo gabayo badan oo kalena tiriyey, caanna ku ahaa gabayga, ayuu gabaygan tiriyey isagoo aamaanaya Geela. Wuxuu ku doodayaa in lo'da iyo arigu aanay gaari kari karaynin geela. Annagoo qayb gabayga ka mid ah soo qaadanay wuxuu yiri:-

**Adhi waa dhallaan iyo haween dhimaradiisiiye,**
**dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka karameede**
**dhaqaalaha haweenka iyo guryaha siima dhaafsanee**
**lo'da dhiiqda laga maalayo dhayda iyo xoorku**
**dhudhunkay biyaha kula jirtiyo dharabka weeyaane**
**mar hadday abaaruhu dhacaan dhimatay geesleeye**
**ragga laxaha sii dhawrayow dhaqasho waa geele.**
**Dhibaatiyo adoo gaajo qaba dhaxanta jiilaalka**
**dhoor caano laga soo lisoo yara dhanaanaday**
**nin dhadhamiyey wuu garanayaa dhul ay qaboojaane**
**goortaad dhantaa baa jidhkaba dhididku qooyaaye**
**ragga laxaha sii dhawrayow dhaqsho waa geele.**

**L A Y L I S :**

1) Ereyadan gabayga laga soo xulay siday gabayga ugu jiraan u macnee:-

1) dhallan, 2) dhimiro, 3) dhaldhalaal, 4) ciir, 5) dhuub, 6) karan, 7) dhiiq, 8) xoor, 9) dhudhun, 10) dharab, 11) geesley, 12) dhagasho, 13) dhul ay qaboojaan, 14) dhoor.

2) Toddobada tuduc ee u horreeya si fiican u sharax.

3) Ariga, lo'da iyo geela midkee ugu manaafacaad badan? Sheeg kaad adigu u haysato inuu ugu manaafacaad badan yahay, wuxuu kuwa kale dheeryahay?

4) b) sida gabyaagu leeyahay, lo'da, ariga iyo geela midkee dhaqashada ku fiican?

t) xoolaha la dhaqdo saddexda jaad ee gabayga ku jira keebaa dhibaatada ugu adkaysi badan, xagga xannaanadana ugu hawl badan? keebaa ugu sid - qaad dheer, keebaana ugu sid - qaad yar?

j) Jaadkee subagga caanahiisa laga helaa?

5) Sheeg jaadka xoolaha gabaygu ka hadlayo ah ee saantiisa aqalka miyiga lagu isticmaalo?

6) Sayladda xoolaha lagu kala iibsado jaadkee baa ugu qaalisan? Xagga dhaqankeenna kee baa ugu qaayo weyn?

7) Haddaba laba jaad baa qodaalka beeraha dalkeenna meelo ka mid ah lagu isticmaalaa, magacow labadaa jaad, dalka meelaha beeraha lagaga qotana midba tusaalo ka bixi?

8) Saddexda jaad mid ka mid ah ayaa laboodkiisa la rartaa, la fuulaa (rakuub); lana dhaansadaa, sheeg?

9) Yaradka hablaha la guursado laga bixiyo keebaa badanaa la bixiyaa? ka soo qaad saddexda jaadba in reerka yaradka bixinayaa leeyahay? hablaha in yarad laga bixiyo ma ogoshahay? waayo?


10) Dhaqaalaha dalka kaalin weyn bay kaga jiraan geela, ariga, iyo lo'duba. Sheeg waddamada loo dhoofiyo iyo dekedaha ay ka dhoofaan ee dalkeenna ah?

11) Dalkeenna gobolkee ugu xoolo badan (geela, ariga, iyo lo'da)

12) Imisaa lagu qiyaasaa tirada xoolaheenna aynu dhaqano?

13) Biyaha imisa casho ayuu geelu ka qadaa? Lo'duna? Ariguna?

## LIBAAX, HABAR IYO ABEESO



Waxa faanay libaax, habar iyo abeeso. Libaaxii baa yiri: «Waar bal qof walowba maxaad cid yeeli kartaa? Anigu muddo yar baan beel dhan ku baabi'in karaa, mid aan dad ka dilo iyo mid aan duunyo kala tagaba. Habartii baa tiri: «Waxba maad sheegin ee anigu beel iska dhan ayaan belo dhexdhigi karaa oo isku roogi karaa». Abeesadii baa tiri: «Waar waxaasu waa meel soke. Reer iska idil ayaan subaxdii cidi ka dareeri karin». Saddexdoodii ayaa isku waafaqay in ay istijaabiyaan.

Markii habeenkii dumay ayuu libaaxii yiri: «Bal labadiinnu i dhawra sidaan wax u galo. Markaasuu intuu reer soo dulfariistay, ciyey oo reemay oo marba gees u orday si reerku u

naxo dabadeedna uu ugu dhaco. Hase yeeshee sidii yur loo lahaa ayaa waagii ku beryey isagoo aan waxba qaadin.

Habartii baa habeenkii labaad tiri: «Anna ha lay fiirsho». Markaasay guri gashay oo bariidisay. Markay qofkii dumarka ahayd ee guriga lahayd wax siisay ayay tiri, «Naa ninkaagii meeyey?», «Arigii buu ku maqan yahay» naagtii baa tiri. «Naa ma kuu warramaa, sow shalay isagoo gabar kaynta kula haasaawaya maan arag, naa is muuji bahal ku qaadye oo indhihiisa wax tus», habartii baa tiri.

«Oo halkay ahayd»? «Dee kobteer geedka hareeriga ah ayey ahayd. Waxay ahayd mid aan fartaada gaarteen oo laakiin iska ladan oo mas ciideeda». «Beryahanba ninka xaalkiisa waan garan la'aa. Ninkii baa soo noqday, markuu gurigii soo galay, ayey naagtii udub intay qaadday madaxa kaga dhufatay oo tiri: «Waar orod tii shalay qabo oo naga tag muuqaaga la waaye». Ninkii kama roonaane hangool buu qaaday oo maskaxda ayuu ku kala jeexay halkii baanay ku qudh beeshay.

Nasiib darro ninkii isna ma badbaadin ee reerkii gabadhu ka dhalatay oo la yiil, ayaa gabadha walaalaheed ka soo yaaceen oo ninkii dileen,

Abeesadii baa tiri: «Waxba maydaan qaban ee aniga i eega, oo inna keena». Markaasay reer dul yimaaddeen, markaasay abeesadii intay hore u martay ayey tiri: «Marka reerku seexdo ayaan gelayaa oo giddi wada cunayaa». Markay waxoogaa socotay ayey gama'day dabadeedna halkii ayaa waagu ugu beryey oo lagu diley.

**L A Y L I S:**

1) Saddexda kee ugu belaayo badan?

2) Belaayadaas wax ka taataabo?

3) Maxaa muujinaya in dadku ugu maskax badan yihiin?

4) Libaaxii iyo Abeesadii way ku dhaceen imtixaankii, waayo?

**Maahmaaho.**

1) Tuugo kula taalla tabtaa ma weeydo.
2) Abeeso yey dhul u eki kugu dilin, wadaadna yuu dad u eki kugu dilin.
3) Hubsiino hal baa la siistaa
4) Waxaadan hubsan baa hog kaa rida.

**Halxidhaale**

Naasa dameeraad ma horaadaa ma danbeedaa?

**BEER FALANNO (hees)**



Qodaalka beeraha iyo ujeesashada xagga dhulka waxay ka mid tahay jidadka waaweyn ee lagu gaari karo himilooyinka kacaanka Soomaaliyeed oo ah in barwaaqo la gaaro. Heesta waxa tiriyey Marxuunkii ahaa abwaanka weyn Aweys Geedow. Aweys, alla naxariistii janno ha ka waraabiyee, wuxuu curiyey Riwaayado, heeso iyo gabayo ka soo qayb qaatay gobannimada iyo xilligii hore.

## Beer falanno

**Annagaa ballannee barbaarey biyo waa la helee
aan baxnee badarkii abuurnee beerihii aan falnee
aan is barno inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee
beer nin falaa ma baryoo weligiisna ma baahoodee
aan is barno inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee**

**Inaan baar aan tagnoo bilcantii aan la baashaalnee
balwo aan tunnoo baallo dheello kuma baanan karnee
aan is barno inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee
beer nin falaa ma baryoo weligiisna ma baahoodee
aan is barno, inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee.**

**Barkin meel la dhigtoo la buurtoon la baraaruginee
barqadii la kacoo bilaashley la cunaan baranee
aan is barno, inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee.
beer nin falaa ma baryoo weligiisna ma baahoodee
aan is barno, inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee.**

**Badar oo badaha, lukeenoo baladkoo ka baxee
bardaxiisana waa ayaane bil ma gaari karee
aan is barno, inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee.
beer nin falaa ma baryoo weligiisna ma baahoodee
aan is barno, inaan beer falannoo aan ku baahi baxnee**

**L A Y L I S :**

1) Heesta yaa curiyey? Kuma ayaa ku luuqeeyey?
2) Abwaanku yuu ku hal qabsaday? Muxuuse ugu baaqayey?
3) Sheeg saddex wax oo waaweyn oo badarku ku baxo?
4) Siduu innoo tusaalaynayaa Aweys qiimaha beerta?
5) Sharax beydka 7aad iyo kan 8aad?
6) Muxuu abwaanku ku diidayaa cuntada debedda?
7) Heesta korka ma ka qaybtay?

## Buraanbur

Gabadh la yiraahdo Cibaado Moxamed Caduur oo ku dhalatay magaalada Hargeysa 1920kii ayaa lahayd afar hablood. Gabadhaas aabbaheed wuu dhintay innamo ay walaalo yihiinna may lahayn, waxayse lahayd gabdho badan. Haddaba iyadoo ka xun rag la'aanta haysatay iyo gabdhaha badan ee ay dhashay ayey, nasiib wanaag, dhashay wiil. Wiilkaas ayey dabeedna aad ugu faraxday, buraanburkan soo socdana waxay ku tirisay farxaddii. Sida muuqatana waxay si kalgacayl ka ifayo ugula talinaysaa inuu noqdo kii danihiisa aan hallayne u guntanaada. Waxay tiri :-

**Dagaalladii baabi'iyo reerihii dam yidhi**
**ilmo waxaan duugi jirey, kaan ku daayayow**
**dunida oo ii sinnayd danabkii ii dhashow**
**Diiriyow kii hablaa soo dugsiiyayow**
**hooyo Deyrow ma jiro waxaan dad kula simaa**
**Ilaah daayow waxaan hooyo kaaga digey**
**fariidka dan seega doqon xoolahaa ka roon**
**dadkuna ma jeclaado nin aan duunyo badan lahayn**
**dedaal oo hooyo weliga ha duud galayn**
**dumarna waa bahalo ee kay duufsadaan ha noqon**
**ayaad ku dulloobin aqal kay dadka u dhisteen.**

**L A Y L I S :**

1) Markii uu wiilku dhashay maxay ugu faraxday?

2) Maxay gabdhaha ugu tilmaantay dhaxan wiilkana dugsi?

3) Waxaa soo dhan maxaa ku kallifay?

## Geeraar

Dunidoo dhan adduunka
xoolahaa ku dingiiga
baansiinkaa durduraaya
maynagaa iska dullaysan
diirad aynu ku eegniyo
berri baanu ka duuli
dal shishaan u socdaa
dadkaygaan ka masruufi
dulli weeye waxaasu eh
dalka aan u shaqeyno
dacwad maa ka qabtaan?
d a l k ii s a g u b aa y a
dibindaabyo ku nool
kuwaan daadihinayniyo
dadweynaa i d i l k ii
nin walowba dantaadu
derbi gaara dhistaayoo
l a c a g daadihisaa?
maatadii dalkeenna
innagoo isku duuban
dalkeennaa u wanaagsan
dahabkaa iska buuxa
lacagtaa iska daadsan
dabaabaad iyo xoog iyo
dad shaqeeya lahayn
dayuurad baanu ka raaci
deyn yar baan ka rabaa
doqonnimiyo ceeb
innagoo isku duuban
danta aan u dhaqaaqnee
doqon aan wax kasayn
dad islaama xantiisa
kii da'diisu dhammaatiyo
inta buugga dayeysiyo
su'aal baan u diyaarshaye
ma inaad dallacdaayood
fatuurad dabadheeriyo
ummad maaha danteed
danihii waddankeenna
dalka aan u shaqayno

dacwad maa ka qabtaan?

waxaa tirisay Dahabo Barkhadle

L A Y L I S :

1) tuduca lixaad:-
lacagtaa iska daadsan


b) Muxuu gabayaagu uga jeedaa?

t) Sidee baa lagu heli karaa lacagtaa?

j) Lacag sideeda dhulka ugu daadsan weligaa ma guratay?

2) b) sheeg tuducyada dhawrka ah ay murtidoodu ku soo dhammaatay «doqonniimiyo ceeb, dulli weeye waxaasu e»?

t) Maxay dhibaato u keeni karaan dalkeenna?



3) Gabayaagu waxay tiri: «Innagoo isku duuban dalka aan u shaqayno». Maxaynnu ku gaari karnaa isku duubnaan dalka loogu shaqeeyo?

4) Tuduca 30aad, 31aad, waa maxay su'aasha gabayaagu u diyaarisay dadweynaha idilkii? Tumaa geeraarkan tirisay? Magacow maansooyin kale iyo dumarkii tiriyey?

## MARTI SOOR DABAGAALLE. (sheeko)



Waxa la yiri, nin, naag, gu', iyo dayr baa wada socdaaley. Waxay u hoydeen dabagaalle meel deggan. Si fiican buu u soo dhoweeyey, gogol wanaagsan buu dhigay, wuxuu misna la amakaagay martida sillan iyo siday isu soo weheshadeen. Waxbuu u loogay, sheeko haasaawaa wuu u qabtay, intay hilbuhu ka bislaanayeen. Markii hilibkii diyaar noqday, baa dabagaallihii wuxuu martidii ku yiri: «Waxaan ku dadaalayaa inaan afartiinna martidaa ah, mid walba u sooro sida geddiisu tahay».

«Guga geddiisu waxay tahay inuu raago oo goor la jabay weligii yimaado. Hase ahaatee markuu yimaaddo wax weyn buu taraa. Hadda isaga wax siin - maayo ee gaajadiisa halla jiririqleeyo. Waxaan ka ballan qaadayaa inaan marka waagu soo dhowaado si wanaagsan u dhergiyo. Isagu bal hay seexdo».

«Dayrta geddeedu waa in kolna la helaa, kolna la waayaa, weligeed layskuma halleeyo, hadda anigu cad weyn baan gudcurka ugu tuurayaa inay weydo iyo inay hesho mid kastaba haw noqotee». «Naagta geddeedu waa inay wax ay hayso oo la wada arkayo ka been dhaarato. Haddaba anigu waxaan jeclahay inaan sooro ee Allow intiyo intu igu dhacdo haddaan wax haysto. Ha iska seexato. «Ninka geddiisu waa wax dil iyo wax noolayn, labadaasay ku dhisantahay. Anoo hela inaan degdeg wax u siiyo ayaan hubinayaa afkiisa iyo addinkiisa inaan ka baxsado». Xagga iyo aqalka markuu u dhaqaaqay ayuu maqlay ninkii oo leh war yaraa. Intaannu gurigiiba gaadhin buu soo noqday oo yiri: «Afeef baan geystay». Markaasuu ku xila furay inuu ninka ka seexanayo.

**maahmaaho**

1) Saddex lalama dego:- bakhayl damac yaqaan, fule daandaansi badan iyo doqon fiiro taqaan.

2) Hal diidaysaa geed ay ku xoqato ma weydo.

**L A YL I S :**

1) Tilmaan ka bixi wuxuu falay dabagaalle?

2) Ma oofiyey dabagaalle ballamihiisii?

3) Maxaa ku kellifay dabagaalle wuxuu sameeyey?

4) Dulucda sheekadu waa maxay?

**Halxidhaale**

1) Sheeg meesha dadku geela uga weynyahay

## Hantiwadaagga Cilmiga lagu Habeeyey (Hees)

Heestan waxa tiriyey cabdi Muxumed oo ku dhashay Miyiga Gabiiley Sannadku markuu ahaa 1935 kii. Cabdi wuxuu ka mid yahay hobollada Waaberi. Heesta wuxuu Cabdi inoogu macnaynayaa si hufnaan ah, innooguna sheegayaa qiimaha iyo waxtarka uu leeyahay mabda' Hawl iyo Hantiwadaagga dalkeennu ku dhaqmayo. Heesta beyd walba ereyada adag wuu ku hor qoran yahay macnihiisii. Tusaalo haddaynnu u qaadanno ereyga hantiwadaag waxaa innoo laqabaynaya, sheekadan gaaban ee Cali iyo Cumar. Labada wiil waxay ahaayeen walaalo. Aabbahood wuu dhintay, hantina wuxu uga tegey geel. Waxay noqdeen jaallayaal is jecel oo xoolohooda wada jirta. Dhibta iyo dheefta hantida uma kala hari jirin ee way u sinnaayeen. Labada caana maal iyo wixii u raaca marka ay geela maalaan caanaha hadhuub bay ku wadaagi jireen, sidii aynu aabbayaasheen ka soo dhaxallay. Sidaas oo kale ayaa dadkeennu hantida aynu leenahay oo ah dhulka, mood iyo nool ama ha dul yaallo ama ha duugnaatee loona siman yahay, loona wada wadaagaa. Kolkaas ayaa labada eray ee ah «hanti» iyo «Wadaag» noqdeen «Hantiwadaag» markii la isku daray. Sida kor ku sheegan hantida uun lama wadaago ee hawshana waa la wadaagaa.

### HANTIWADAAGGA CILMIGA LAGU HABEEYEY (Hees)

1) Waa hilinka — Jidka, waddada.
2) Nolol hagaagsan oo habboon lagu helaayee.
3) Waa hilinkii.
4) Harraadka iyo gaajada lagu hilmaamee.
5) Waa hilinkii.
6) Kuwa dhiigga heensada hanaqa goynayee, fuuqsada, wadnaha caba.
7) Waa hilinkii.
8) Sinnaan la wada helayo iyo hayey garsooridda.
9) Waa hilinkii.

10) Dadkoo shaqo u heegganoo hal ah tilmaamayee. «**u diyaar ah».**

11) Waa hilinkii.

12) Nin hurdoo wax helaya iyo **hagarta** diidayee. **«Xisdiga».**

13) Waa hilinkii.

14) Nafteenna oo aan **hiishan** iyo kalsooni noo hayee. **«Kaalmaysanayo»**

15) Waa hilinkii.

16) Inaynnu hal ahaanno oon is helno doonayee.

17) Waa hilinkii.

18) Gumaystaha wax **heera** iyo harkiisa diidayee. **«Dila».**

**19) Hantiwadaagga Cilmiga lagu habeeyey.**

20) Waa u hiilinaynaa.

21) Waan u hagar - baxaynaa.

22) Cadowga waan ka horjoogsanaynaa.

23) Hantiwadaagga Cilmiga lagu **habeeyey. «Hannaanshay.**

**L A Y L I S :**

1) Heesta yaa tiriyey?

2) Nolol hagaagsan» muxuu uga jeedaa curiyuhu?

3) Tusaale fasalkaaga ah ka bixi beydka 8aad.

4) Muxuu ula jeedaa kuwa «dhiigga heensaday» Cabdi?

5) Maxay keentaa isku kalsooni la'aantu?

6) Goorma ayaa Guddoomiyaha GSK Jaalle Siyaad ku dhawaaqay mabda'a Hawl iyo Hantiwadaagga?

## XILKA GUUD AHAANEED IYO KA GAAR AHAANEED
### (Gabay)

Gabaygan oo uu tiriyey ama curiyey Cabdilkadir Xirsi «Yam - Yam» wuxuu kaga hadlayaa waajibka saaran ardayga, askariga, odayga, afada, inanta, Ummusha, iyo Ummadda gebi ahaanba. Xilkaas, nolosha bulshadu si ay u hagaagto qiimana u yeelato, waa in qof waliba kaalintiisa si xilkasnimo ah uga soo baxaa, ka guud ahaaneed iyo ka gaar ahaaneedna waa in loo soo wada jeedaa. loona wada jiraa. Isla - markaa, waa in had iyo jeer maskaxda lagu hayaa in aan dalku qofna ka dheregsanayn, si dhibaatooyinka nolosha innaga haysta looga guulaystana, aad iyo aad, loogu wada shaqeeyo; taasoo aad loogu baahan yahay in daacadnimo iyo hufnaan loogu wada shaqeeyo. Wuxuu yiri:

**Arday waxa ku waajiba inuu edeb lahaadaaye**
**oo uu akhriyo meeriskoo dhab u adkeeyaaye**
**Markaasuu aqoontiisa guud ku aflaxaayaaye**

**Askar waxa ku waajiba inay calanka eegaane**
**Ay kuna ilaashaan awood aalad iyo xooge**
**Markaasay ka gudan karaan eedda kii galaye**

**Oday waxa ku waajiba inuu beesha ururshaaye**
**Nabaddana abaabulo halkuu abidkii joogaba e**
**Markaasaa inuu caaqil yahay lagu ogaadaaye**

**Afo waxa ku waajiba inay aqalka joogtaaye**
**Oo ay asluub iyo xishood ku asturraataaye**
**Markaasaa inay aamin tahay lagu ogaadaaye**

**Inan waxa ku waajiba inay arag samaataayee**
**Oo ay afar - qaadka iyo orodka deysaaye**
**Markaasaa gayaankeed arkaa lana aroosaaye**

**Ummul waxa ku waajiba inay ubadku nuuqaane**
**Oo ay canqarisaa ilaa ay ka ababaane**
**Markaasay hadhow aayo wacan ku anfacaay aane**

**Ummadda waxa ku waajiba inay aamin noqotaaye**
**Oo ay israac iyo heshiis ku anba qaadaane**
**Markaasaa inay adag yihiin lagu ishaaraaye**

**L A Y L I S:**

1) Ardayga maxaa ku waajiba?
2) Odayga maxaa ku waajiba?
3) Afada maxaa ku waajiba?
4) Inanta maxaa ku waajiba?
5) Ummusha maxaa ku waajiba?
6) Gebi ahaan Ummada maxaa ku waajiba?
7) Afo waxaa ku waajib ah inay aqalka joogtaaye?

Tuducan sharax: «Aqalka joogtaa» aad isaga hubso, waayo sida macnaha qayaxani muujinayo ulajeeddadu way ka qoto - dheer - tahay.


## DAYO IYO DIBINDAABYADEED (SHEEKO)



Waxa la yidhi boqorka habar dugaag ee Libaax baa bukooday. Markaasuu god galay, wuxuu ku tashaday inaanu intuu buko ee tamar daran yahay gaajo u dhiman. Dawacuu u yee-

ray oo ku yiri: «Adigaan kuu dhiibey taladii dugaagga oo iga wakiil ah intaan ka bogsanayo». Waa yahay sarreeye bay tiri Dawacadii. Maalintii dambe bay Dawacadii isugu yeertay dugaagii oo ku tiri: «Boqorkeennii Libaax wuu bukaa ee waa in la soo booqdaa, oo mid mid loogu tagaa». Sidii bay yeeleen oo mid mid ugu tageen, Libaaxiina wixii u soo galaba wuu cunaa. Dharaartii dambe ee meertadii Dameer Farowga ay ahayd ayey Dacawadii u yeertay Dameer Farowgii oo ku tiri: «Waa dharaartaadiiye, orod oo soo booqo duqa, haddii kale wuu kuu uur xumaan, wuuna kula colloobi markuu fayoobaado». «Waa yahay» buu yiri. Dameer Farowgii intuu taw yiri buu godkii Libaaxa qoorta la galay. Goortaasuu Libaaxii ku soo booday oo labada dhegood ku dhegay. Dameer Farowgii dib buu isu giijiyey, oo dib isu soo dhuftay, markaasaa labadii dhegood afkii Libaax ku hareen. Isagoo dheg go'an oo dhiig ka hooraayo ayuu ku soo noqday Dawacadii oo ku yiri: «Naayaa Daya axdi alla ku qabay, illayn weligaaba anuun baad igu ahayd duullimaad ood doonaysay inuu Libaax i cuno». Dawacadii baa tiri: «Nacaska daya, Libaaxu wuxuu doonayey inuu ku boqro, oo koofiyaddii boqornimada kuu geliyo, suura galna maaha inuu koofiyad madaxa kuu geliyo iyadoo dheguhu kugu yaalliin ee orodoo ku noqo». «Ma sidaasay ahayd arrintu? haddaan gartay. Mar labaad ayuu dameer Farowgii dhabaabaco is dhigay oo Libaaxii ku noqday oo gedkii qaarka dambe la galay. Libaaxii baa ku soo booday oo dabada ku dhegay. Markaasuu Dameer Farowgii dib isu soo giijiyey oo aad isku adkeeyey, illaa dabadii go'day oo dhiig ka hayraafay. Dawacadii buu u yimid oo ku yiri: «Bal waxaad ii geysatay eeg». Dawacadii baa tiri: «Waw! illayn doqoni caqiibo ma leh, war yaahee ma waxaad garan wayday inuu Libaaxu doonayey inuu kursi dahab ah kugu fariisiyo oo ku sooryeeyo». Imikana aan kuugu ergeeyee i sug. Markaasay intay in yar ka maqnaatay ku soo noqotay oo ku tiri:- «Waan kuula soo hadlaye orodoo ku noqo oo mar dambe haynna ceebaynin.»

Markaasuu doqonkii Dameer Farow ku noqday Libaaxii oo godkiisii ugu galay, dabeedna halkii Libaaxii ku cunay. Libaaxii wuu iska ladnaaday oo godkii ka soo baxay. Wuxuu arkay Dawacadii oo geed hadhaca fadhida oo barwaaqo ku jirta markaasuu yiri: «Dayooy, maxaad ii soo booqan weyday markaan bukay een liitay»? Dayaa tiri: «Libaaxow ma nacas baad



i moodday sideen kuugu imaadaa, sow ma aan arag inaan wixii kuu soo galay dib kaaga soo noqonayn». Kolkaasay iska dhaqaaqday.

**Maahmaahyo**

1) Doqon baa halkii lagu khatali qoorta soo dhigane, maanaa mindiyo lay qarshaa laygu qali doono.
2) Doqon dagnaan lagama waayo.
3) Gal dad liqa ul baa layskaga dayaa.


**L A Y L I S :**

1) Muxuu Libaaxu godka u galay?
2) Maxay Dawacadu dugaagii Libaaxa soo booqanayey ugu dooratay in ay mid mid u galaan godka?
3) Sidee bay u bi'isay Dameerkii oo ugu dirqisay inuu galo godkii Libaaxa?
4) Goormay gaadhay wax yeelladii ugu horaysay Dameerka? Maxayse ahayd?
5) Laba ujeeddo oo laga leeyahay sheekadan muuji?

**Halxidhaale**

Sheeg cadka geela ku yaal ee ceydhinka lagu cuno.

## HEESTA AFKA HOOYO




Heestan ka hadlaysa qoraalka afka hooyo, waxay innoo

caddaynaysaa heerka iyo halka uu afkeenna hodanka ku ah murtidu ka joogey afafka dunida. Qoraalka afka hooyo iyo hirgelintiisa waxa lagaga baxay dhibaatooyinkii innaga haystey dhinac kasta oo nolosha laga eego, dhaqanka, dhaqaalaha, waxbarashada, bulshada, iyo wixii la halmaala. Heestan oo la dhalatay ku dhawaaqiddii afka hooyo waxa curiyey abwaanka caanka ku ah heesaha, gabayada iyo riwaayadaha, Xasan Sh. Muumin oo ka mid ah abwaanada waaweyn ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

**Taariikhda qarada weyn afkeenii ka qatanaa**
**qayaha uu leeyahay dunida ka qarsanaa**
**qorrax baa u soo baxdoo mugdigii ku qoofillaa**
**daahii ka qaadnee, qalinkaaga ii dhiib**
**erayada an kuu qoro, qummaati uga bogoo**
**fartii qalaad ha moodin carrabku qaldi maayee**
**sidii caanaha qudhqudhiya, sidii caanaha qudh-qudhiya.**

**Murtideennii quusatee qaawanayd qurux samaa**
**sumadda loo qalqaaliyee lagu qoray qummanaa**
**maantuu qab weyn iyo qosolku ii xalaal yahoo**
**maanku ii qaboobayaa, qalinkaaga ii dhiib**
**erayada an kuu qoro, qummaati uga bogo**
**Fartii qalaad ha moodin carrabku qaldi maayee**
**sidii caanaha qudhqudhiya, sidii caanaha qudh-qudhiya.**

**L A Y L I S :**

1) Maxay ahayd taariikhda abwaanku sheegay ee «afkeennu ka qatanaa?

2) Sheeg qiimaha uu u leeyahay horumarkeenna qoraalka afka hooyo?

3) Sheeg qoraalka farta ka hor afafka aynu wax ku baran jirrey?

4) Sheeg dhibaatooyinka ay innoo lahayeen?

5) Cilmiyada kala duduwan afkeenna ma ku baran karraa? Waayo?

6) Heerka waxbarashadu iyama ayuu fiican yahay hadda iyo hirgelinta qoraalka farta ka hor?

7) Ma suurta geli lahayd af shisheeye in dadkeennu wax ku wada barto? Waayo?

## GAADIIDKA (Curis)

Gaadiidka waxa la yidhaa wixii la rarto ama la fuulo amase rar iyo fuulimo la isugu daro.

Gaadiidku kolka hore labuu u qaybasamaa: a) Nafley, sida geela iyo lo'da, oo ishin la isku yidhaahdo, iyo gammaanka oo isna u kala baxa fardo, baqlo iyo dameero. Ishinka iyo gammaanka labaduba waxay ka mid yihiin nafleyda xoolaha ah ee dadku dhaqdo ee la rarto, lana fuulo (wax tarkooda kale mooyee), gaadiidna laga dhigto. Waxa kale ee nafleyda gaadiidka laga dhigto ka mid ah ase aan laga aqoonin dalkeenna maroodiga iyo «laamada» oo u eg geela. Maroodigu dalkeenna wuu joogaa, gaadiidse lagama dhigto. Laamahase dhulkeenna lagama helo. Qaybtaa hore ee nafleyda ah ee gaadiidka laga dhigto ee aynu soo sheegnay, waa wax Ilaahay abuuray. Gaadiidka qaybtiisa kale waxay tahay wax dad sameeyey oo saddex jaad u kala kaca:-

1) Gaadiid badda mara, sida doonyaha iyo maraakiibta.

2) Gaadiid dhulkaa mara, sida Tareenka iyo baabuurta.

3) Iyo gaadiid cirka duula, sida dayuuradaha.

Gaadiidka qaybtiisa hore ee nafleyda ahi, meel wadda ah iyo meel aan wadda ahayn ee qarda-jeex ah, labada wuu mari karaa. Gaadiidka aan nafleyda ahayn ee dadku sameeyey, doonyaha iyo maraakiibta oo badda mara mooyaane, kuwa kale, ee tareenka iyo baabuurtu ka mid yihiin, waddo ay maraan baa loo sameeyaa. Dayuuradaha cirka duula naftoodana waxa loo sameeyaa gego ay marna ka duulaan marna soo fadhiistaan.

Dayuuradaha la yiraahdo Helikobtarka iyaga meelo badan baa la fadhiisiiyaa. Waagii hore, ee gaadiidku uu nafleyda oo keliya ahaa, ee aan gaadiid kale oo la sameeyey jirin, adduunyadu aad isuguma socon jirin, maxaa yeelay, gaadiidka nafleydu wuu daali jirey. Gaadiidka cusubise isaga oo jaba mooyee haddii la dhaqaajo ma joogsado, jaadka nafleyda ahna ka dhaqso badan, kana qaad weyn. Hase yeeshee, wuu ka waxyeello badan yahay.

**L A Y L I S :**

1) b) Gaadiidka nooli immisa jaad buu u qaybsamaa?
   t) jaad ka mid ah weli ma fuushay? Magacaw?
   j) Waxtarka ay dadka u leeyihiin waa maxay?
   x) Xannaano maxay u baahan yihiin?

2) Qor gaadiidka cusubi intuu u kala baxo?
   t) Immisa jaad oo gaadiidka cusub ka mid ah ayaad raacday?
   j) Mid kastaa meeluhuu maro qor?
   x) Gaadiidka cusubi muxuu dunida u taray?
   kh) Muxuu dhibaato leeyahay?

## DALXIIS (gabay )

Dalxiisku waa xubin lama huraan u ah horumarinta dhaqaalaha dalka, Maamulka tawriga ahina isagoo sidaa garansan ayaa aad loogu dedaalaa loona daryeelaa. Cabdilkaadir Xirsi (Yamyam), oo gabayaa caan ahina isagoo tilmaamaya meelaha ku fiican dalxiiska iyo baahida tamashlaha meelaha loo qabo, ayuu gabaygan curiyey, wuxuu yiri:-

**Tamashlaha inaad daawataa sow dantaa maaha**
**Deebliyo wajaaliyo Berbera kac iska soo daawo**
**Degmada Cerigaabiyo maxaa Daalo kaa qadiyey**
**Taleexdii Daraawiishta iyo maad daarihii aragtid**

biyo kulule labadiisa dacal dacal ku soo maayro
didibkii casaa Gaalkacayiyo dooxadii Mudug day
geel soo darmaday Caabudwaaq weelka ii dara dheh
Beledweyne webigaa dulmara daadka badan dheeho
daruur soo dhowaatiyo qabow aan ku dilahaynin
ku dekee haddaad Jawhar timi waa dan raaxadu e
dhulka dihin badweynta deggan Xamar u soo doono

kalluun duban, digaag shiilan daawe lagu shiilay
oon deeq laguu siinayaa Xamar u soo doono
dayaaradaha dheereeya ee dunida meeraysta
gegiday diyaar kuugu tahay guuxi aan damine
dal dhowaysa deeqaa beryahan lagu dekeeyaaye
aroortii Kismaayo ugu duul oo ka dego Waamo
dadab dhigan daryeel lagu sharfo daacad soo hoyo ah
salaan diirraan qalbi farax ku dedan udug ka soo duulay
dad walaalahaayoo ku jecel ubax ha kuu daadsho
ha ku daadahsheeno bulshada debin la haasaawa
waa meel hawadu dilliintehee dibadda laafyooda.

Galabtii magaalada u daadega adinka oo duuban
duufaan iyo dabayl ma ay lahoo ciiddu waa dahabe
dekadiyo wershadaheeda badan libin la daaweysta
ha degdegine muuska isdulyaal daymo iyo raaxo
halka dunida kala qaybisiyo webiga soo daawo.


Dayaaradaha dheereeya ee dunida meeraysta
gegiday diyaar kuugu tahay guuxi aan damine
dal dhowaysaa deeqaa beryahan lagu dekeeyaaye
aroortii Kismaayo ugu duul oo ka dego Waamo
dadab dhigan daryeel lagu sharfo daacad soo hoyo ah
salaan diirran qalbi farax ku dedan udug ka soo duulay
dad walaalahaayoo ku jecel ubax ha kuu daadsho
ha ku daadahsheenoo bulshada debin la haasaawa
waa meel hawadu dilliintehee dibadda laafyooda.

Galabtii magaalada u daadega adinka oo duuban
duufaan iyo dabayl ma lahoo ciiddu waa dahabe
dekediyo wershadaheeda badan libin la daaweysta
ha degdegine muuska isdulyaal daymo iyo raaxo
halka dunida kala qaybisiyo webiga soo daawo.

**L A Y L I S :**

1) Qaayaha uu dalxiiska u leeyahay dalka sheeg?
2) Muxuu u taraa qofka dalxiisku?
3) Sheeg meelaha dalxiiska ku fiican ee dalkeenna?
4) Maxay caan ku yihiin meelahaasu?
5) Waxyaalaha la xidhiidha dalxiiska yaa daryeela?
6) Degaankaagu ma leeyahay meel dalxiiska ku fiican? Hadduu leeyahay weli ma soo daawatay?
7) Ugaadhu dalxiiska ma ku fiican tahay? Dugaagga isaga ka warran' dalxiiska siduu ku yahay?
8) Waxyaalaha dalxiiska ku fiican ee gabayga ku jira sheeg?

## XANNAANADA XOOLAHA



Xoolaha oo si habsami ah loo xannaaneeyo waxay horseedday inay kordhaan tirada xoolaha dalka iyo wixii innaga soo gala sidaa awgeed waxay heestu innugu baraarujinaysaa xoogeynta xannaanada xoolaha oo waqtigan aad dawladda iyo

dadkuba isugu taxalujiyaan' xil gaar ahna iska saaraan. Heesta waxa tiriyey Ciise Maxamed Faarax oo ku dhashay Laasqorey' sannadii 1974kii

**xagal daac ka dhawra.**

**Xubnaha dhaqaalahaa**
**isugu xirxiran oo**
**xeel iyo dagaal iyo**
**n i n b a xaasilkiisu**
**annagana xoolaha nool**
**Xurmeeyoo xannaanada**

**Sida xarigga soohan**
**marka ay xumaatee**
**xabbad laysu qaato**
**la xamaaran doonaa**
**dalaggaa dhulkeenaan**
**xoolaha iyo daaqa**

**xagal daac ka dhowra..**

**Waxa nool aduunyada**
**cudur yaanu xaabin**
**xaaluf yaanu laynoo**
**kuwa loo xilsaarow**
**annagana xirfadda wacan**

**xayntu yey idlaanoo**
**xilliyada abaaraha**
**harraad yaanu xiirin**
**xejiya xaggiinna**
**xeradaan adkaynaan**

**bahal uga xijaabnee.**

**Xurmeeyoo xannaanada**
**xoolaha iyo daaqa**

**xagal daac ka dhawra.**

## L A Y L I S :

1) Sheeg labada xubnood ee abwaanku ka tilmaamayo xagga dhaqaalaha?

2) Lama huraan waa caws jiilaal ee maxaa hantiya ee aan haysannaa haddii dagaal dhaco oo xaal xumaado?

3) Muxuu innagula dardaarmayaa gabayaagu?

4) Muxuu abwaanku ku tilmaamayaa inay u daran yihiin xoolaha iyo daaqa?

5) Gaar ahaan yaa loo xilsaaray xannaanada xoolaha?

6) Ayuu ula jeedaa abwaanku kuwa «xirfada wacan»?

7) Adiga xil ma kaa saaran yahay xannaanada xoolaha dhirta iyo daaqa? Waayo?

## BURAANBUR

Waxa tirisay Cibaado Maxamed Cadduur waxayna u tirisay inan la guursaday iyadoo la sii dardaarmaysa una guntaysa waanooyin iyo dardaaran. Waxay uga dhigtay inanay noqon mid dhega adag ninkeedana dhibta, oon gurigeeda laga cararin dibeddana wareegta, gurigeedana dayacda. In aanay noqon mid duleedada kale ka duryanta, amase basari noqota. Cibaado, gabadhan waxay u diidaneyd in sinaba loo saluugo, waxaanay tidhi:-

**Hooyo ii soo dhowow oo dhegta iga maqal**
**Dhawaaqan ishina dheel-dheel ayaanu noqon**
**Been ha u qaadan beerku ka soo go'e**
**Ceebta waa laga fogaadaaye foojignaw**
**Ayaanu ciishoonin wiilkaa ku soo calmaday**
**Ciidan wuxuu kariyey cunnadiisa yaanay noqon**
**Intii xigtada u ah iyo gacalka wada xurmee**
**Ayaanay kaa waalan hablahay walaalaa yihiin**
**Xumaan kugu waanin maaye dadkaba xaqdhawr**
**Kulayl ragga waw balaayey u baarid noqo**
**Kolba dhawaaquu yidhaahdo dhegaha aad u geli**
**Sidii reer degay aqalku yaanu daadsanaan**
**Halhays qaarbaw leh reer hebel ma soo dayaa**
**Sheeko waa lagu habsaamaaye yey ku hodin**
**Adna jidhkaagoo dulli ah dibadda hawla bixin**
**ilaalo xumaatay waa laysku eersadaa**
**Ayey ku saluugin dumarkeenu sahamiyaa.**

## L a y l i s

1) Maxay u dardaarantay gabadhaasu?

2) Waxyaalaha ay uga digtay maxaa ugu weynaa?

3) Socodka badani maxaa dhibaata ah ee uu gabdhaha u keenaa?

# RAFAD (GABAY)



Cabdillahi Cabdi Shube, oo ku dhashay kuna barbaaray magaalada Hargeysa ee xarunta Gobolka Woqooyi Galbeed, caanna ku ah gabayada ku saabsan maadda, majaajillada iyo murtidaba ayaa gabaygan Rafad la yiraahdo tiriyey isagoo kaga hadlaya kol - kol dhibaatada qabsata, Raha, Askariga, Dillaalka, Dayuuradda IWM. Wuxuu yiri:-

**Geeraar laabta ku raagay oo calooshayda raftay**
**Oo dadka ruuxa maqlaa qosol uu rafanaayo**
**Sidii Raage Ugaas iyo rijaalka Cali Geele**
**Rax bal aan kaga siiyo ee ruux walowba dhegeyso**
**Rahu hadduu biyo waayo dhoobaduu ku raftaa**
**Inankaan la rabbaynina edebtuu ku raftaa**
**Reer magaale gaboobayna hadday ruux murmayaan walluhuu ku raftaa**
**Dillaal saylad ku raagayna xariggu la raftaa**
**Ninka jaad ruugga u aastayna marqaankuu la raftaa**
**Ruux hadduu ilka waayana hilibkuu la raftaa**
**Ramad geela nin maalay kibrad buu la raftaa**
**Rubbiyad aan sarrifnayni kiishadday rafataa**
**Dayaarad riin ka xumaaday samaday raftaa**
**Roob magaala ku hooray ramaas soo bixin**

**maayee laamiguu ku raftaa**
**Naag hinaase ku raageyna rugta sooma gashee qolqolkay rafataa**
**Inanta roorta duleedkee, reerkoodii iman wey-dey, ilmuun baa ku raftaa**
**Askari tuug eryayaana siidhiguu la raftaa**
**Barlamaan aan run aqoon iyo shicibkuna waysla raftaan.**

L A Y L I S :

1) Cabdillahi Cabdi Shube gabayo kale oo uu leeyahay ma taqaan?

2) Gabaygan tuducee baad aad ugu bogtay? Maxaad ugaga burisay tuducyada kale?

3) Sharax:- inankaan la rabbaynini edebtuu ku raftaa». «Ruux hadduu ilka waayana hilibkuu la raftaa» «Rubiyad aan sarrifnayni kiishadday rafataa»

4) Kollay qosol ilkuhu kaa daate e, maxaad murti kala kulantay gabaygan?

**LAX INDHA LA'. (Sheeko)**



Beribaa lax indha la' oo ari la daaqaysey ka luntay. Halkii

ay joogtay bay iska fariisatay, kolkii ariga sanqadhiisii ka go'day. Fiidkii baa waraabe arkay. Kolkaasuu soo ririyaaqay oo is yiri allaylehe caawaad hilib ka dheregtey. Sidii waran laganay ayuu orod labada dhegood soo nabay oo laxdii isku soo daayey. Laxdiina markay sanqadhii waraabaha maqashay bay moodday ari meesha maraya. Markaasay iyana xaggii sanqadha isku qaadday. Waraabihii baa yaabay! Markaasuu is taagay, gig! Cabsi baa Ilaahay u keenay oo wuxuu yiri waar «Naftu waa mallayee, Laxdu saw na cuntee.»

Waraabihii orod buu dhabarka jeediyey, laxdiina way isdaba dhigtay. Halkii baa la is eryaday iyadoo waraabuhu is leeyahay naftaada la baxso, laxduna is leedahay ariga gaar. Naxdin iyo cabsi darteed ayuu waraabihii hanaq go'ay oo meyd ahaan dhulka ugu dhacay. Laxdiina siday u daba orday-say bay waraabihii ku turunturrootay oy ku barbar dhacday. Halkiibaa subaxdii loogu yimid iyadoo waraabihii garab fadhida.

## L A Y L I S :

1) Laxdu maxay u urin weydey **waraabaha??**

2) Ma runbaa waraabuhuu waa fuley?

3) Libaax, sidaasi ma ka suurtoobi lahayd?

4) Dulucda sheekadu waa maxay?

### Maahmaahyo

1) Fuley intuu ba'ayaa badan.

2) Fulow guuli kuu dhow, kaana dheer.

### Halxidhaale

Sheeg Af Soomaaliga. erayada ku dhamaada K iyo J.

## HEESTA GEELA



Hees hawleedkan kala duduwan ee geela, waxaan ka soo guurinnay buugga hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed ee uu qoray Jaalle Cumar Aw Nuux, oo ka mid ahaa Guddida Af - Soomaaliga haddana ka tirsan Akadamiyada hiddaha iyo dhaqanka. Heestu waxay inna baraysey sida loogu heeso geela marka la daaq geeynayo; carraabinayo; carrada la siinaayo; iyo marka la waraabinayo.

### MARKA LA DAAQ GEYNAYO

**b)** **Geerida haween**
**Guud la fidho iyo**
**Guursi laga qaad**
**Geeridaydana**
**Guryo ba'ay iyo**
**Goblan laga qaad**
**Geeridaadana**
**Gaawe madhan iyo**
**Gaajo laga qaad**
*******

**t)** **Saddeex boqol iyo**
**sagaashan habeen**
**oo sidkaa yahay**

Sabool sugi waa
oo ku soo saar
Anse kugu simay
*******

## MARKA LA CARRABINAYO

b) Habaar qabihii
Hooyadaa diley
Yuu ku heerine
Haruuga carrow
*******

t) Saw carraabadu
Caafimaad iyo
Caana kuuma leeh?
*******

## MARKA CARRADA LA SIINAYO

b) Heelley, boonjiga carradaa
Heelley, baadh-badhatooy,
*******

t) Helleey, halaan baarqab dhalin
Helleey, baabah bawdo iyo
Helleey, baar looxa ma leh
*******

j) Helleey, candho dalawa leey
Helleey, cadowgaa dulaw

## MARKA LA WARAABINAYO

b) Sidii sagal roob
oo si san u da'ay
Waa sugeynaye
Maysa soo shubay'.
******

t) Hormo awr lihi
Hoorri kululaa
oo ninka hayaa
Hawl u adagaa
*******

j) Ceel aan kuu galay
ciil uma qabtide
cawska debedda ah
ee rarruuruhu kaa celceliyaan
ciil ma ku qabtaa?
*******

Carruuraha jaa miyey ku ce:heen,
hi'yaad camalliday, saw cadkaygaba,
ceeriga ishiyo ceelka kama garan.

MARKA LA DURDUURAYO

b) Helleey, sool baad tegiye.
Heelley, Soddon baad qadiye
Helley, sulubey biyaha
Helley, sararaha biyee
Helley, sidaan doonayiyo
Helley, siibsiib u qabo
Heelley, suluqana ka reeb
******

t) Heelley, olol qaaxo weyn
Heelley, dayow legdamay
Heelley, co mid u adkaa
Heelley, kii kalena coy
*********


j) Heelley, waa maalin caws
Heelley iyo maalin ceel
Heelley, iyo maalintii
Helley, maraqiyo candhada
Heelley, loo maydhi jirey.

LAYLIS:

1) Tixaha heesta ee ka bilaabma «saddex boqol iyo . . . . anse kugu simay» si faahfaahsan uga sheekee macnahooda.

2) Tiri hees hawleedda geela lagu waraabiyo iyo tan carrada lagu siiyo.

## ISKAA WAX U QABSO *(gabay)*



**Iskaa wax u qabso waa dhismaha laysku aamino e**
**Ururkiyo aqoontay u tahay aaya xoog badane**
**Onkod iyo hillaac weeye iyo aaran soo baxaye**
**Ammuuraha wanaaggiyo dantaa lagu aloosaaye**
**Ulajeeddadeenaan rabaa inan iftiinshaaye**
**Abuur naga maqnaa iyo haddii ubax la beeraayo**
**Awood waxaynu leenahay haddii lagu ogaanaayo**
**Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye**

**Oogada ninkii dhidida baa uurka dhaansada e**
**Itaalkaaga oo hagar baxaad umalka reebtaaye**

Arladaada qodo gaajadaad kaga adkaataaye
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye

Addimmada haddii ciidda ugub lagu irmaaneeyo
Ayaamahan gadaalkood runtaad ku arki doontaane
Irsiq laga dhergiyo waa nimcada agabbarkeediiye
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye

Abaar kama baxaan niman hadday kala irdhoobaane
Dad Illaaway eed iyo xumaan baa ayaansada e
Arrin dhiman waxaa lagu abyaa ul iyo diirkeede
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye

Ilays laguma doorsado mugdiga awdanoo damaha e
Ummadnimadu waa hawsha oo oogta loo kaco e
Naftii orodka kugu aamintaa lagu ilaashaaye
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye

Abda ma laha oontii dal kale kugu aloosaaye
Afka waxay u dhowdahay inuu eeyar kaa jaro e
Isaguba se waa kugu ogyahay iin aad leedahay e
Iimaanka aadaa dhul kale iibna waw halise
Abaalkay shisheeyuhu baxshaan oonka bi'in waaye
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye

Aadmiguba ubad kuu dhaluu aad u koriyaaye
Ilmaha calanka waa ku ababshaa aabbihii dhalaye
Istareexa iyo noloshu waa eexasha la'aane
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye

Udbuhu wada jir bay aqalka iyo awrta ku hayaane
Ummad ururtay aabigu ma karo eebo duul kale e
Arbiyo geesi, aar iyo libaax, soo ag mari waaye
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye

Ugaadhuba irdaha dabin markay eegto way garane
Agoontaadu waa inay fogtahay aad il dheer tahay e
Aslanna talada unuggeeda waa loo abtiriyaaye
Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggoolaadaaye

**Ayaxuba abaahida dhulkuu eel ku rimiyaaye**
**Isticmaarku waa uga eg yahay iimuhuu qarine**
**Ilkihiisa oo kuu cad buu aasayaa belo e**
**Iskiin wax u qabsada tacabka waa la oggolaadaaye**

**Waxa tiriyey Maxamed Ismaaciil Axmed**

**L A Y L I S :**

1) Erayadan gabayga laga soo xulay, mid walba sida uu ugu jiro tuduca u macnee: aanayn, aaran, aloosaaye, umalka ciidda ugub, iin, ababshaa, talada unuggeeda, abaahada, aabigu.

2) Tuducyadan lagu soo qaaday gabayga sheeg ulajeeddadooda:

   b) Oogada ninkii dhidida baa uurka dhaansada e,

   t) Abaar kama baxaan nimaan hadday kala irdhoobaane,

   j) Addimmada haddii ciidda ugub lagu irmaaneeyo,

   x) Odbuhu wadajir bay aqalka iyo awrta ku hayaane,

   kh) Ummad ururtay aabigu ma karo eebo duul kale e.


3) Soo koob murtida gabaygan ee tuducyadiis 25 - 31.

4) b) Wax ka sheeg heerka iskaa-wax-u-qabsadu kaga jirto horumarka dalkeenna,

   t) Tilmaan mashaariic dhowra oo iskaa - wax - **u - qabso lagu** sameeyey; degmadaada gobolkaaga, iyo jamhuuriyadaba.

   j) Mashruuc iskaa - wax - u - qabso lagaga shaqeeyo kee ugu horreeyey? Goormuu ahaa? Meeshuuna ahaa?

## NIMAAN HADLIN HABIRTIINA WAX MA SIISO (Sheeko)




Maalin maalmaha ka mid ayaa waxa isa soo raacay habar dugaag oo oomman. Waxay heleen ceel biyo yarood ah intii ugu xoogga roonayd baa damacday in biyaha sida loo kala waa-

weyn yahay loo kala badsado guddina way u saareen xaalka soo gebegebeeysa illayn intii yaryarayd baa saami ku doodaysa e gari laba nin kama wada qosliso ee, go'aan waxay ku gaadheen in wixii yaryar ah la oomiyo.

Atoorkii baa yidhi «waar gaal dil gartiisana sii» isagoo ka gilgilanaaya xaqdarrada, caws buu ku cartay oo kufay. «Itaalkayga waad aragtaan, biyahana, heshiis kama oggoli» atoorkii baa sidaa ku dhaartay oo intuu orday ceelkii is kor taagay. «Ninkii u xoog roonaadaba waaba la arki, waar intaasay dhaari iga tahay inaan ceelkaas laga cabbin illaa la isku gooyo (laayo). «Gacmihiinna maantaan ku jiro hay gargaarina e, geerida ninkii ii hayaa haygu rido goofe.»

Hanjabaaddii, hadalkii kulkululaa iyo ficiladii uu muujiyey awgood baa atoorkii lagaga cabsaday oo lagu tix geliyey, oo halkiina biyihii lagaga qayb geliyey, oo weliba loogu hor mariyey.

**L A Y L I S :**

1) Maxay ku kulmeen habar dugaag?
2) Maxay intii roonroonayd ku tashatay?
3) Yaase ka dhiidhiyey taladaas?
4) Sidee bay gari laba nin uga wada qoslin weydey?
5) Dulucda sheekadu waa maxay?

### Maahmaaho

1) Nin afle baa abaar ka baxa.
2) Togba taagtii buu rogmadaa.
3) Geesi alla ma xilo.
4) Rag lama maleeyo.

### Halxidhaale

Waa maxay labada faruuran ee abaarta lagaga baxaa?

## HEESTA LO'DA

Hees hawleeddan kala duwan ee ka hadlaysa marka lo'da la waraabinayo, la daajinayo, iyo marka la carraabinayo waxaannu ka soo guurinnay buugga hiddaha iyo dhaqanka ee uu qoray Jaalle Cumar Aw Nuux oo ka tirsan Wasaaraddad Tacliinta Sare J.D. Soomaaliya.

### MARKA LA WARAABINAYO

b) **Waa naftaada e**
**naanida ha jebin**
**oo ninka ha dilin**

t) **Dar la qaadiyo**
**daruur hoortaba**
**doollin daba roor.**

j) **Daaduuf inad tahay**
**aan dad kula socon**
**dawliska hortiis**
**dareemiba mayn**
**an ma daalo e**
**ad is daba joog**

### MARKA LA DAAJINAYO

b) **Sacba naagta leh**
**salsallowyoo**
**sideeda u socoy**

t) **Ninka dooriyo**
**Allow dhoobbiga**
**aan lagaa dilin**
**aad ku daaqdide**

### MARKA LA CARRAABINAYO

b) **Luuli gabadhlow**
**laafyo wiillow**
**laalays ma hormaday**

t) **Caawa xeradii**
**xulaan - xuliddaa**
**xil ma nagu tahay?**

**L A Y L I S :**

1) Qor hees hawleed Lo'da lagu waraabiyo!

2) Si ballaaran u sharax tuducyada lo'da lagu carraabiyo: Luuli gabadhlow, laafyo wiillow, laalays ma hormaday?

## ISKAASHI (Curis).

Weligiiba dadka Soomaaliyeed, meel kasta ha joogee, wax buu wada qabsan jirey. Reer miyigu gaadiidka wuu isa siin jirey, oo gaadiid qaad iyo gaadiid celisba way lahaayeen. Qoyska aan markaa xoola irmaan lahayn, maal baa la siin jirey, geel, lo' iyo adhi mid kastaba ha loo maal siiyee. Haddii nin guursanayo, asaanu xoola ku filan lahayn waa la kaalin jirey. Hadduu nin gabadh la soo tago, marka uu reerka keeno, aqal baa loo guri jirey uu ku guursado. Qoyska ama ninka caydhooba, waa loo xoolo goyn jirey. Degmada meel wada taal hadday doonaan inay balli ama haro ay dad iyo duunyaba ka cabbaan, qotaan way wada qodan jireen. Inta la keeno xoolo hilib ah iyo caano iyo cunto kaleba, ayaa ragga qaarba gees ka soo qodi jireen. Ceelasha wiyeerka ah ee bir qodka ah, iyo kuwa ceel cammuudeedka ah, iyagana sidaas oo kale baa loo wada qodan jirey loona wada cabbi jirey.

Kolka la guuro qoyska awrtiisu aqlal u wada qaadi kariweydo, amase awrta qaar ka garba - beelaan, qoysaska ayaa wax tari jirey oo qola waliba walax u qaadi jirtey. Xooluhu hadday baxsaddan amase baadiyeystaan, waa laysla baadidooni jirey, hadday xooluhu oomaan waa la wada aroorin jirey, hadday xooluhu jeelaan waa la wada carrayn jirey, haddii la dhaansanayaana waa laysu gargaari jirey, sidaasay berigii hore Soomaalidu ku dhaqmi jirtey welina ku dhaqantaa. Taa waxa raaca in haddii degmo ay qodaal (beralay) tahay, cishaba beer

lagu guuso. Haddii beertaa la qodayana nin waliba wuxuu soo kexeeyaa qindigiisa (labadiisa dibi), kolkaasu la qodaa. Haddii la miigeynaayona, qof waliba yaanbadiisa ayuu soo qaataa. Kolka beertu biqisho, ee biqilku fara qaris noqdo waa la isugu yimaaddaa oo la baaqbaaqaa. Marka beeruhu bislaadaanna, beerba kol baa la gooyaa oo wixii ka baxay la oodaa. Waaga danbena beer walba wixii ka go'ay inta meel bannaan oo gego ah la keeno, ayaa ulo waaweyn raggu hareeraha kala soo joogsadaa oo la tumaa.

**L A Y L I S :**

1) Sheeg saddex wax oo ka mid ah waxyaalaha ay Soomaalidu isla kaashan jirtey!

2) «Taageeraday laba gacmood tamar ku yeeshaane, tiska waxa la qaadaa markay tiirisaa bidixe, hadday midigtu keli taagan tahay tahar ma goyseene». Ka faallood gabaygan oo uu tiriyey Cabdillaahi Muuse iyo xidhiidhka ka dhexeeya deriska kor ku dhigan ee ka hadlaaya «Iskaashiga!»

**Gabay (Siyaad)**

Sida aannu filayno in la wada ogsoon yahay, Jaalle Sarraaye Gaas Maxamed Siyaad Barre, aad buu isugu hawlaa daacadna ugu yahay danaha Ummadda Soomaaliyeed. Waxa la rumeysan - yahay inaanu si sharci darro ah ugaga faa'iideyn naftiisa, qaraabadiisa iyo saxiibadiisaba awoodda uu gacanta ku hayo. Madaxdii inna soo martay 1960 - 1969na taasuu kaga duwan yahay.

Gabayaaga caanka ah, abwaankana ah, Xaaji Aadan Afqalooc, isagoo tilmaamaya amuurahaas ayuu gabaygan oo dheer, laakiin qayb yar uun aannu kasoo qaadnay, curuiyey dabbaaldeggii Oktobar 1970kii, wuxuuna yiri:-

**Seddex buu ku yahay qaadadii aradka Soomaale**
**Surwaalkii ma dhigin iyo dharkii sawjarnimadiiye**
**sar intuu abuurtay uma bixin soohdin laydh badane**
**socdaal uguma kicin Yurub intuu saydhey maal badane**

**Suhuun kuma leh baanka iyo shirkado soorta iibasada e**
**sokeeyaan lahaa iyo ma odhan seeddiyay xiga e**
**saqda dhexe intuu liida tegey looma sacabbaynne**
**sidii uu dad kale yeeli jirey wuu ka saahidaye**
**soo jeed habeen iyo fakar baa solay naftiisiiye**
**sabab taqaddum lagu gaadho buu ku hurdo seegaaye**
**sidaasay dadweynuhuna kalsoonida dhab ugu siiyeene**
**saciim buu Afriiqiya u yahay saadiq aaminahe**
**sida qamarka oogada socda bay sare u eegaane**
**sawdkuu la yeedhiyo codkaa loo sid tiriyaaye**
**seeftii nasriga iyo wuxuu sitaa suuratal ikhlaase**
**sagal hooray buu noo yahay iyo seermaweydada e**
**sidii lagu tilmaamaba runtii uga sinnaad roone**
**sidaasay dad weynuhuna kalsoonida dhab ugu siiyeene.**

## L A Y L I S:

1) Erayadan gabayga laga soo xulay siday gabayga ugu jiraan micnahooda u sheeg:-
solay, sid tiriyaa, sagal, seermaweydo, iyo suhuun.

2) Yaa tiriyey gabaygan? Muxuu ka hadlayaa?

3) «saddex buu ku yahay qaadadii aradka Soomaale». tuducdani saddexda qaadada ah ee uu ka hadlayaa waa kuwama?

4) Surwaalkii ma dhigin iyo dharkii sawjarnimadiiye, sheeg macnaha ka dambeeya tuducan?

5) Sidii uu dad kale yeeli jirey wuu ka saahidaye, dadka kalee laga hadlayaa waa kuwama? Siday yeeli jireen dadkaa kale ee Siyaad ka saahiday siyaabaha ay yeeli jireen?

6) «Sida qamarka oogada socday sare u eegaane», kumaa sida qamarka sare loo eegaa? Muxuu dheer yahay madaxda kale ee isaga sare looga eegay?

7) «Sowdkuu la yeedhiyo codkaa loo sid tiriyaaye», sharax tuducan, gaar ahaanna ka hadal waxa siyaad hadalkiisa loogu sid tiriyo?

8) «Sar intuu abuurtay uma bixin soohdin laydh badane», «sabab taqaddum lagu gaadho buu ku hurdo seegaaye», tuducyadan dhexdooda ku buuxi kuwa ka maqan, adigoon ka eeganayn gabayga qoran?

## HEESAHA CARRUURTA



Heesahan gaagaabani waxay ka hadlayaan marka ay hooyadu kolkolineyso ee ilmaheeda ay ugu heesto. Waxaannu ka soo guurinay buugga hiddaha iyo dhaqanka ee Cumar Aw Nuux, oo ka tirsan Wasaaradda Tacliinta Sare J.D. Soomaaliya, uu qoray.

## HEESTA WIILASHA

a) Ayaa dilayoo dagaalay?
ayaa duur kulul ku jeexay?
ninkii dilayee dagaalay
ninkii duur kulul ku jeexay
asaan duunyo u diranayn
dagaal baa naga dhexeeya.

***

b) Sidii Bilanow bil dhalatay,
bil dhalatoo beeli aragtay,
sidii burcad loo basaasay,
sidii biyo loo harraaday,
sidii badhax maalin geeddi,
Bilow loo baahanow waa.
boggayga qabawjiyow waa.

c) Ma geelii baa arooray?
arooroo oon ku raagey?
ma naaskii baa gabnoobey?
gabnoobaad godol ka weydey?
ma reerkii baa saboolay?
saboolaan subag ku siinnin?
ma aabba kaa socdaalay?
socdaaloo socod ku raagey?
wardoon baa innoo maqnaaye,
warsani haynoo yimaaddo.

### Gabadha.

a) Canbaro kaalay korkaaga,
korkaaga cad ee wanaagsan
kulayl cudur kaama daaro.

***

c) Gayaankaa baa fadhiya e,
dar baa geel shalaytto waday e,
guddiga qaar baa ku jira e,
gartaadii bay hayaane,
talay geedka u tageene,
go'doy gaagaabso hadaka!

## L a y l i s

1) Maxaa looga jeedaa marka hooyadu ku koolkooliso ilmeheeda «ma naaskii baa gabnoobey, gabnoobaad godol ka weydey».

2) Dusha ka qor afar tuduc oo ka mid ah heesta hooyayadu ku kolkoliso hablaha iyo afar wiilasha ah?

### HOOYADA, (Gabay)

Jaalle, Cabdulqaadir Xirsi «Yamyam», oo halkan aannu ku soo qaadnay gabay gabayadiisa ka mid ah oo uu u tiriyey hooyada wuxuu si hufan u tilmaamayaa hooyadu kaalinta lamahuraanka ah ee ay kaga jirto dhismaha ummadda. Waxaa cad inaan cidna la barbar dhigi karayn hooyada markay yimaaddaan, deeqda, sharafta,dulqaadka, gaarinimada, quruxda, gacaltooyada, hawlkarnimada, kartida, naxariista, iyo mudnaanta. Isagoo arrimaha si hufan oo tafaqyatiran u tilmaamaya wuxuu yiri:-

**1. Hadba gabaygu heerbuu maraa laga higgaadshaayee**
**Hal abuurka maansadu dhan bay ula hagaagtaaye**
**Halkii ay la qaadduu markaa dhab uga heesaaye**
**Ujeeddada markuu kula helaad u hanqal taagtaye**
**Hilinkii u toosnaa ayaan haabo leeyahay**
**Maantana haweenkiyo balaan hooyadow mariyo**

**2. Weliba dirir kharaar iyo markay hiillo waran joogto,**
**Hayaay iyo markay soo baxaay hadalku uu gaaro**
**oo cadowgu uu soo handado haraci aad jiiftey**
**In haweenka dhiidhiyey rag badan uga horraynaayo**
**Hannoolaato kii joogey baan marag u haystaaye**
**Ammaan aan la soo hidin karayn hooyo adigaa leh.**

**3. Hoo iyo markii gacanta deeq laga hibaynaayo**
**Gobannimada say ugu helaan lagu harraad beelo**
**Qaar aan waxbana haysan oo gaajo la hullaaban**
**Ayaa huray go' keliyoy dushaa ku huwanaayeene**

Hannoolaato kii joogey baan marag u haystaaye
Halgankii billado aan ka sido hooyo adigaa leh.

4. Hiddihiyo markii dhaqanka guud lagu hobshaynaayo
Ayagood haldhaa moodid iyo goray hadaafaaya
Ama geenyo halabaysanoo heenso lagu gaacshay
Waa kuwa hugii soo xidhood u hanqal taagtaaye
Habka noloshu gaartana bar baa laga helaayaaye
Hambalyo aan hiddaha kaaga wado hooyo adigaa leh.

5. Hawshiyo markii reer dhismihii lagu hagaagaayo
Hor-u-socod markii ay tehee hilin la qaadaayo
Marka leys hanuuninahayee hadaf la sheegaayo
Hayaan iyo markii geeddi dheer lagu horeedaayo
Weligood haweenkaa mutoo lagu halleeyaaye
Gacaltooyo aan hagar lahayn hooyo adigaa leh.

6. Hammo iyo ninkii guur damcee ku hindisoonaaya
Hannaankeedu deeq, tuu markaas laabta ka haweysto
Haasaawaha markey kala bogtaan laysla helo sheeko
Markii hoyga loo geeyo ay hanato qoyskiisa
Ayuun buu harraadkuu u qabay haakah leeyahaye
Karti iyo hufnaan gaarinnimo hooyo adigaa leh.

7) Harkii qadada, habeenkii cashada, hiirta waabeiga
Hongoriyo kulayl bay intaa Hodan dhex joogtaaye
Hakanmayso oo shaqadu waa himiladeediiye
Calooshana ilmihii baa hurddoo sii harratiyiye
Sagaal bay culayska hantidaa dhibina haysaaye
Hibashiyo xusuus aan harayn hooyo adigaa leh.

8. Halis weeye fooshuye markay gelin hinraageyso
Ilaah baa hawadiyee markii inan ka soo haado
Haraaryada ayada oo wadnuhu hilib dalqaha joogo
Nabarkiina uu weli hayey haw ku soo orane
Durbana way hilmaantaa wixii kaar hayoo idile
Kalgacayl Ilaahay hortii hooyo adigaa leh.

9. Xinjirtii markii laga hufoo Haybe laga meyro
Hungurigaa engega ubadka aan cidi hab siineyne
Horaadkeeda bidix bay intaa ku hellinaysaaye
Hawadiyo dhulkaa uma oggola halaqu joogaaye
Hadba labada sacab bay intaa kor ugu haysaaye
Naxariista hoygii Janno hooyo adigaa leh.

10. Harqaboobe guradeedu waa harac la seexdaaye
Garbaheedu haar bay noqdaan harag sidiisiiye
Kaadida markaad ku hurguftood weelka ka hallayso
Haah kuma tiraahdiyo habaar la isku hiifaaye
Hadmuu socodka baran bay intaa ku hammiyeysaaye
Sharaf aan cid kale heysan karin hooyo adigaa leh.

11. Hadday marato dhiishaadu waa ba' iyo hooggeede
Ayadoo hamuuntii qabtoo laabta ka harraaddan
Hambadaada meel bay dhigtaa yuu hadhow qadine
Hilibkeedu wuu baaba'aa Hodan daraadaaye
Hurdana seexan meysoo aday heeggan kuu tahaye
Gobonnimadu waa kuu hiddee hooyo adigaa leh.

12. Shimbir heestay oo kale markaad hadalka googoyso
Hadaaqay waxay kuu bartaa sidii habboonayde (Hadalka toosan)
Ilaa aad halyey noqoto ood hanato reerkaaga
Hareertaada midig bay intaa ku hirgisaysaaye
Haweenkaad waxay kuu tareen ku haqabbeeshaaye
Nabigiiba tii hayn jirtaay hooyadaa mudan leh.

13. Intaan hubinnay taariikhdu waa lama hilmaamaane
Afar heer ayey soo martoo dunidu waa hawle
Habkii hore addoonsuu ahaa boqorro haystaane
Habkii xigey dhulkii waxaa hantiyey niman halyeeyaahe.
Hantigoosi baa kii beddeley way halgamayeene
Haddana hawlwadaag baa socdiyo lama huraankiiye

Qolo waliba kay haysatee ku hindisoonaysey
Haddii aan haweenku u qorshayn uma hagaageene
Iyagaa hoggaanka u hayoon ku hiraneynaaye

14. Hayin weeye heeryada ku raran aan hunguriyeyne
Waa daacad haantay sidaan aanay habihayne
Higaaggiyo linguxu waa midaan hibitiq sii deyne
Hal irmaana weeyoo degmada lagu halleeyaaye
Haruubkoodu waa kaan marnaba hoos ku maranayne
Hor Ilaahay duulkaasi waa horumarkeeniiye
Hawl - karnimada waa lagu ogaa tan iyo Haabiile
Hawadiyo haddaan malab ka dhigo ciidda hirarkeeda
Hoosiis macaan iyo haddaan harac qabow seexsho
Haddaan hilibka googooyo oon jeerba hurin siiyo
Abaal ay mar qura ii hurtaanan heedhe gudiheyne
Anigiyo waxaan haysto iyo himiladaydoo dhan
Oo aanan waxbana kaala harin hooyo adigay leh.

## L A Y L I S :

1. b) Waxaad qortaa tuducyada tilaamaaya hooyada dagaalyahannimadeeda.

   t) Tuducyadee baa inna tusaya deeqda hooyada

   j) » » » xarragada iyo sharafta hooyada.

   x) » » » Hawl - karnimada hooyada

   kh) » » » gaarinnimada hooyada

   d) » » » gacaltooyada hooyada

   r) » » » dulqaadka hooyada

   s) » » » mudnaanta hooyada

2. b) «Ayagood haldhaa moodid iyo goray hadaafaaya, ama geenyo halabaysanoo heenso lagu gaacshey.
Labadaa tuduc sheeg siday u tilmaamayaan socodka haweenka.

t) «Waa kuwa hugii soo xidhood u hanqal taagtaa ye», tuducdan sharax.

j) «Hadaaqay waxay kuu bartaa hadalkii toosnaaye». Ka hadal waxay tuducdaasu tilmaamaayso.

x) **«Hayin»** weeye heeryada ku raran, aan u hunguroonayne, waa daacad haantay sidaan aanay habihayne». Labada erey ee hoosta xarriqdu ka marsan tahay micnee.

kh) Hooyada iyo aabbaha midkee baad aad u sii jeceshahay? Waayo?

d) Hooyo maxay kaa mudantahay? Waayo?

Buraanbur: WAAR SOW MA BAABI'N

Buraanburkan waxa tirisay gabar la yiraahdo Xaliimo Soofe oo curinta buraanburrada aad ugu fiican. Waxaanay kaga hadlaysaa dacaayaddii aan salka lahayn, ee isticmaarku ka faafiyey dalkeenna iyo dadkeennaba, iyo sida tawradda barakaysani dacaayadda intay baabi'say u muujisay dunida kartida, miraha wax wada qabsiga, isku kalsoonaanta iyo sida ummadda soomaaliyeed muddo yarba ay horumarka dalkooda uga muujiyeen. Waxay tiri :-

Buuggii isticmaarka iyo beentii uu ka tegay
bangiyada ibir ah iyo baahi baa idin layn
bilay ku dhammaan haddayan dawlad kale u bixin
waar sow ma beenoobin baryadii la doonan jirey.

Dhulkoodu waa baaba'iyo buuro wada engegan
cusbaa ku ballaaratoo beero kama baxaan
waar sow ma beenoobin hadalkuu basaasku yiri

Tacliintoo baaba'da iyo baylah baan ka dhigi
ha **baygagee** ubadka Biiskoorbis baan u diri (ha hallaabee)
**Baduugaha** laga dhigayoo geesiyaa u baxay (baguugaha)
billaadahay tosheen baa beerku ololayaa
war soow ma beenoobin baadaan ka dhiganahayaa

**Saxada** barbarkeeda bohol baan u dumin hayaa (caafi-maadka)
markay naga badatay bugtadii ilaahigeen
Ummaddu waa baaba' oo boog ma dhayi karaan
waar sow ma beenoobin barafasoor laguma oga.

Billaawaha laysku dilo aad baan u bari
caddaaladdu inay bir tahay yaan ku beerayaa
haysku baareen markay baaba'ooda tahay
waar sow ma beenoobin sharcigii la boobi jirey.

**L a y l i s.**

1. Buraanburkan markii la curiyey yaa dalka maamula-yey (ka talinayey)?
2. Buraanburku muxuu ku saabsanyahay (ka hadlayaa)?
3. Qor waxyaalaha isticmaarku ummaddeenna ku dacaa-yadeen jiray ee buraanburka ku jira?
4. Yaa ummadda inay dacaayadda baabi'so u horsee-day? Sidee loo baabi'iyey?
5. Buraanburkan maxaa kaaga kordhay?